Edina
High School
DEFINING EXCELLENCE

# Buug-gacmeedka Ardayga iyo Qoyska ee 2026-27



# Tusmada


Tusmada 2
Soo Dhaweyn Ka Socota Kooxda Maamulka 6
Soo Dhaweyn Ka Socota Xubnaha Hoggaanka Golaha Ardayda ee Edina 7
**Macluumaad Guud 8**
Hadafka Dugsiyada Dadweynaha ee Edina 8
Hiigsiga Dugsiyada Dadweynaha ee Edina 8
Macluumaadka Siyaasadda 8
Liiska Shaqaalaha 9
Paul Paetzel 9
Jenn Carter 9
William Britt 9
Michael Pretasky 9
Troy Stein 9
Jeff Pope 9
Liiska Shaqaalaha 9
Halkee Ayaan Caawimo Ka Raadsadaa Dugsiga Sare ee Edina? 9
**Macluumaadka Tacliinta iyo Buundada 10**
Maamuuska Tacliinta 10
Liiska Maamuuska (Fasallada 9 - 12) 10
Shahaadada Guusha Waxbarashada ee Edina (Fasallada 9 - 12) 10
Aqoonyahanada Edina 11
Habab Kale oo Kiridhit Looga Helo EHS (Siyaasadda 620) 11
Kiridhitka Waxbarasho Hore/Kiridhit Lagu Helo Qiimayn (Siyaasadda 620) 11
Qalin-jebinta Hore (Siyaasadda 613) 12
Imtixaanaadka Ugu Dambeeya 12
Shuruudaha Qalin-jebinta (Siyaasadda 613) 12
Waxbarashada Lagu Qaato Guriga 12
Waxbarasho Madax-bannaan 12
Ka Baxsan Dugsiga EHS (Bannaanka) 12
Waaxaha Dugsiga EHS Dhexdooda (Gudaha) 13
Diidmada Waalidka/Masuulka ee Imtixaanaadka Gobolka oo Dhan ah 13
Xulashooyinka Diiwaangelinta Dugsiga Sare Kadib (Siyaasadda 620) 14
Taageerada/Caawimaada Shaqada Dugsiga 14
Shirarka Macalimiinta 14
**Filashooyinka/Habraacyada Soo Xaadiritaanka (Siyaasadda 503) 14**
Maqnaanshiyaasha Cudur-daarka Leh 15
Maqnaansho Kasta oo Cudur-daar Leh 15
12 Maqnaanshiyo Cudur-daar Leh 15
Maqnaanshiyaasha Aan Cudur-daarka Lahayn 15
Maqnaanshiyaal Kasta oo Aan Cudur-daar Lahayn 15
3 Maqnaanshiyo Aan Cudur-daar Lahayn 15
7 Maqnaanshiyo Aan Cudur-daar Lahayn 15
12 Maqnaanshiyo Aan Cudur-daar Lahayn 15
Maqnaanshiyaasha isku Xiga 16

Maqnaanshaha Joogtada ah 16
Soo Daahitaanka 16
Xaadiritaanka Daabuurka iyo Munaasabadaha Dhiirrigelinta 16
**Waxbarashada Onlaynka ah/Maalmaha Cimilada 16**
Dugsi Ma Jiro (“Maalinta Barafka” ee Caadada ah) 16
Maalinta Waxbarashada Onlaynka ah 17
**Tignoolajiyada Elektarooniga ah 17**
Adeegsiga La Oggol Yahay iyo Kan Aan La Oggolayn (Siyaasadda 524) 17
Ujeedada 17
Isticmaalka Taleefanka Gacanta iyo Aaladaha Elektaroonigga ee Shakhsiyeed 18
Filashooyinka Fasalka ee Isticmaalka Tignoolajiyadda 18
Heerka 1 18
Heerka 2 18
Heerka 3 18
Si Khaldan u isticmaalka Tignoolajiyadda 19
Jebinta Koowaad 19
Jebinta Labaad 19
Jebinta Saddexaad 19
Jebinta Afaraad 19
Khataraha Amniga ee Aaladda 19
Xeerka Anshaxa Onlaynka (Siyaasadda 524) 19
Xaddidaadda Mas'uuliyadda 21
**Macluumaadka Buundo-bixinta 21**
Buundo-bixinta (Siyaasadda 618) 21
Xarfaha Buundooyinka iyo Qiimayaasha (Miisaanka Lahayn) (Siyaasadda 618) 21
Xarfaha Buundooyinka iyo Qiimayaasha (Miisaanka Leh) (Siyaasadda 618) 22
Beddelista Buundada 22
Cusboonaysiimaha Tebinta Buundada 22
Tilmaamaha Dib Ka Samaynta Shaqada (Siyaasadda 503) 22
Dib Ka Samaynta Waxyaabaha Aan Dhammeystirnayn (Siyaasadda 618) 23
Codsiga Buundada Baasay/Kiridhit La'aan (Siyaasadda 618) 23
**Adeegyada Caafimaadka 23**
Habraacyada Xafiiska Caafimaadka 24
Maqnaanshiyaasha 24
Gargaarka Koowaad iyo Jirrada Dugsiga 24
Daawo-Siinta Ardayga (Siyaasadda 516) 24
**Macluumaadka Diiwaangelinta/Muddaynta 24**
Koorsooyinka Meelaynta Sare ee Laga Bixiyo Dugsiga Sare ee Edina 24
Shuruudaha iska Diiwaangelinta Koorsada 25
Isbeddelada Jadwalka 25
Ka Bixidda Koorsada (Siyaasadda 618, Lifaaqa I) 25
Ku Celinta Maaddo 26
**Dhaqanka iyo Anshaxa Ardayga (Siyaasadda 506) 26**
Mamnuucista Xoog Sheegashada (Siyaasadda 514) 26
Waxyaabaha La iska Filayo Maqaayadda 27
Qaybinta Agabka (Siyaasadda 904) 27
Mamnuucista Dullaysiga (Siyaasadda 526) 28

War-wareegga 29
Khiyaanada Waxbarashada (Siyaasadda 506) 29
Saraakiisha Kheyraadka Dugsiga (Siyaasadda 507.5) 29
Filashooyinka Ciyaartoynimada iyo Habraacyada Dhacdooyinka oo Dhan 29
Habdhaqanka La Dhibsado 29
Xeerarka MSHSL 30
Lebiska Ardayga (Siyaasadda 504) 30
Badbaadada Ardayga 30
Filashooyinka 31
Cawaaqibta Ku Xadgudubyada 31
Siyaasadda Ka Saarista Fasalka 31
Tubaakada/Qaac-jiidista (Siyaasadda 419) 31
Kharribaadda (Siyaasadda 506) 32
Mamnuucista Hubka (Siyaasadda 501) 32
**Adeegyada Ardayda** **32**
Xarunta Kulleejka iyo Xirfadda Shaqada 32
Qorshaha Helitaanka Luuqadda 33
La-taliyeyaasha Dugsiga 33
Shaqaalaha Bulshada ee Dugsiga 33
**Habraacyada Guud/Macluumaad Kale** **33**
Nidaamka Gudbinta Warbixin Qarsoodi ah – Wax Dheh 33
Qorshaha Maareynta Asbestos-ka 33
Boorsooyinka Dhabarka 34
Kalandarka 34
Cabashooyinka (Siyaasadda 104) 34
Arrimaha Hadal-haynta Dhaliya (Siyaasadda 606-Lifaaqa IV) 34
Maareynta Xasaradda (Siyaasadda 806) 34
Dugsi iyo Goob Shaqo oo Ka Caagan Daroogada (Siyaasadda 418) 34
Ardayda Siddeed iyo Toban Jirka 35
Dhoolatusyada Xaaladaha Degdegga ah 35
Hubinada Sooyaalka Shaqada (Siyaasadda 404) 35
Adeegsiga Loo Siman Yahay ee Tas-hiilaadka Dugsiga (Siyaasadda 801) 35
Gaadiidka Hawlaha Ka Baxsan Manhajka (Siyaasadda 713) 36
Isbeddelada Xaaladaha Qoyska 36
Khidmadaha 36
Ururinta Lacagaha (Siyaasadda 629) 37
Cuntada & Cabbitaanada Fasallada Dhexdooda 37
Hadiyadaha Shaqaalaha (Siyaasadda 421) 37
Xafladda Qalin-jebinta 38
Ka-hortagga Dhibaateynta iyo Rabshadda (Siyaasadda 413) 38
Kaararka Aqoonsiga 38
Tallaalada (Siyaasadda 530) 38
Kormeerrada iyo Baaritaanada (Siyaasadda 502) 39
Siyaasadda Casharada Waxbarasho (Siyaasadda 606) 39
Wareysiyada Ardayda ee ay Sameynayaan Hay'ado Dibedda ah (Siyaasadda 519) 39
Tijaabinta Macdanta Rasaasta (Lead) ee Ku Jirta Biyaha La Cabbo 39

Qadada iyo Quraacda 39
Caymiska Daawada/Caafimaadka/Shilka (Siyaasadda 534) 40
Hawlaha Ardayda ee Aan La Taabagelin (Siyaasadda 628) 40
Takoor La'aanta (Siyaasadaha 103, 521, 522, 528) 41
Ogeysiinta Habdhaqanka Rabshadda Leh ee Ardayda (Siyaasadda 529) 41
Xaqa Waalidku u Leeyahay inuu Ogaado 42
Ogeysiiska Adeegsiga Sunta Cayayaanka 42
Ballan-qaadka Daacadnimada (Siyaasadda 531) 43
U Sii-deynta Diiwaanada ee Dadka Kale (Siyaasadda 515) 43
Deeqaha Waxbarashada iyo Kaalmooyinka Deeqda ah 43
Habraacyada Xiritaanka Dugsiga (Siyaasadda 807) 43
Warbaahinta uu Taabageliyo Dugsiga (Siyaasadda 512) 43
Diiwaanada Ardayga (Siyaasadda 515) 44
Ra'yi Ururinada Ardayga (Siyaasadda 520) 44
Macluumaadka Ka-hortagga is-dilka 45
Safarka 45
Duubista Muuqaalka iyo Codka (Siyaasadda 717) 45
Dadka Soo Booqanaya Dhismayaasha Degmada (Siyaasadda 903) 45
**Xeerarka Baarkinka Baabuurta iyo Socodka Gaadiidka (Siyaasadda 527) 46**
Xeerarka Oggolaanshaha Baarkinka 46
Xadgudubyada 46
**Buugga Siyaasadda Degmada (Tusmada Mowduucyada La Xushay) 47**

> Waxaanu ku dadaalnaa in aan waayo-aragnimo waxbarasho oo tayo leh siino mid kasta oo ka mid ah ardaydeena.

## Soo Dhaweyn Ka Socota Kooxda Maamulka

Ardayda iyo Qoysaska Qaaliga ah ee Dugsiga Sare ee Edina,

Ku Soo Dhawaada Dugsiga Sare ee Edina! Buug-gacmeedkani wuxuu bixinayaa xog tacliimeed iyo xog guud oo ku saabsan sanad dugsiyeedka soo socdo. Waa masuuliyadda arday kasta iyo waalidkiisa(waalidkooda)/masuulkiisa(masuulkooda) inay bartaan oo ay fahmaan waxa ku qoran buug-gacmeedkan. Fadlan u eega si taxadar leh oo waydiiya macalin, la-taliye, ama maamule wixi su'aala ah ee aad qabtaan ee ku saabsan waxa ku qoran. Ardayda iyo waalidiinta waa inay eegaan buug-gacmeedka Xuquuqaha iyo Waajibaadka si ay uga helaan macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan habdhaqanka laga filayo ardayda.

Dugsigeena wuxuu ku soo naaloonayay sumcad loo riyaaqay oo heersare ah oo lagu ammaano heer gobol iyo heer qaranba. Waxaanu leenahay manhaj heer sare ah macallimiintayaduna si wanaagsan ayay u tababaran yihiin waxaana si qoto dheer uga go'an waxbarashada ardayda. Barnaamijyadeena manhajka ka baxsan waa kuwo si lamid ah cajiib u ah. Kooxaha isboortiga ku matala Edina ayaa ku guuleystay in ka badan 200 oo horyaal oo heer gobol ah, taas oo ka badan dugsi kasta oo kale oo ku yaalla Minnesota. Waxqabadyada manhajka ka baxsan ee aan ciyaaraha fudud ahayn iyo barnaamijyada farshaxanka ayaa sidoo kale helay tiro abaalmarino ah.

Jawi dugsi oo badbaado ah isla markaana wanaagsan waa lagama maarmaan. Waxaa la filayaa in dadka waawayn iyo ardayda dhigata Dugsiga Sare ee Edina ay iskula dhaqmaan si xushmad iyo sharaf leh. Qof kasta oo xiriir la leh Dugsiga Sare ee Edina waa inuu dareemaa Jawi diirran oo soo dhawayn leh oo ku habboon in wax lagu barto. Tani waxay u suuragalinaysaa qofkasta inuu wax barto oo uu kobco inta karaankiisa ah. Waxaanu ku dadaalnaa in aan waayo-aragnimo waxbarasho oo tayo leh siino mid kasta oo ka mid ah ardaydeena. Waa muhiim in macalimiinta iyo waalidiinta ay noqdaan shuraako taageero leh si loo kordhiyo fursadaha waxbarasho ee ardaydeena. Waxaan idiin rajaynaynaa wanaag badan sanadkan waxaana ku dadaali doonaa inaan idin ka gacansiino inaad si buuxda uga faa'iidaysataan.

Salaan wacan,

| | | |
|---|---|---|
| **Mudane Paul Paetzel** | **Marwo Jenn Carter** | **Mudane William Britt** |
| Maamulaha | Kaaliyaha Maamulaha | Kaaliyaha Maamulaha |
| **Mudane Michael Pretasky** | **Mudane Troy Stein** | **Mudane Jeff Pope** |
| Kaaliyaha Maamulaha | Kaaliyaha Maamulaha/Waxqabadyada | Hormuudka Tacliinta |

## Soo Dhaweyn Ka Socota Xubnaha Hoggaanka Golaha Ardayda ee Edina

Ardayda iyo Qoysaska Qaaliga ah ee Dugsiga Sare ee Edina,

Ku soo dhawaada sanad dugsiyeed kale oo cajiib ah halkan Dugsiga Sare ee Edina! Inta aanu safarkan si wadajir ah u bilaabeyno, waxaan ku faraxsanahay inaan soo bandhigno Buug-gacmeedka Ardayga iyo Qoyska ee la cusbooneysiiyay ee sanad-dugsiyeedka 2025-2026. Hagahan dhammeystiran waxaa loogu talagalay inuu taageero siiyo ardaydeena iyo qoysaskooda, isagoo bixinaya macluumaad muhiim ah oo ku saabsan siyaasadaha Edina, barnaamijyada waxbarashada, adeegyada caafimaadka, iyo kheyraadka kale ee dugsiga. Waa masuuliyadda arday kasta iyo waalidkiisa(waalidkooda)/masuulkiisa(masuulkooda) inay bartaan oo ay fahmaan waxa ku qoran buug-gacmeedkan.

Jawi dugsi oo badbaado ah isla markaana wanaagsan waa lagama maarmaan. Waxaa la filayaa in dadka waawayn iyo ardayda dhigata Dugsiga Sare ee Edina ay iskula dhaqmaan si xushmad iyo sharaf leh. Arday kasta oo dhiganaya Dugsiga Sare ee Edina waa inuu dareemaa bulsho soo dhaweyn leh oo dhiirigelisa jawi waxbarasho oo wax soosaar leh.

Dugsiga Sare ee Edina wuxuu leeyahay in ka badan 100 waxyaabood oo isugu jira isboorti, kooxo, iyo fursado dhanka farshaxanka ah oo uu ardaygaagu ka qaybqaadan karo. Iyadoo uu haysto 215 horyaal oo heer gobol ah (tirada ugu badan ee uu haysto dugsi sare oo ku yaalla Minnesota) iyo abaalmarino badan oo laga helay barnaamijyada farshaxanka, dugsiga Edina wuxuu kobciyay dareen xooggan oo ku saabsan jacaylka iyo u-heellanaanta dugsiga kaas oo uu muujiyo arday kasta. Dugsiga Sare ee Edina, arday kasta wuxuu soo heli karaa goobtiisa gaarka ah. Haddii ay ahaan lahayd naadiyada kala duwan, kooxaha isboortiga lagu tartamo, ama barnaamijyada farshaxanka ee firfircoon, waxaa loo hayaa hoy' qofkasta.

Dadka sida buuxda uga faa'iidaysta waayahooda dugsiga sare waa kuwa ku lug yeesha waxyaabaha uu bixiyo dugsigooda. Ardayda waxay ka heli doonaan hoy' mid kasta oo ka mid ah boqolaalkaan fursadood. Waxaanu ku boorinaynaa ardayda oo dhan inay sahmiyaan fursadahaan, ixtiraam u muujiyaan qof kasta oo bulshadeena ka mid ah, oo ay ku dadaalaan inay gacan ka geystaan sidii dugsigeena looga dhigi lahaa deegaan loo wada dhan yahay oo soo dhaweyn leh.

Waxaa sharaf noo ah inaan u adeegno ardayda waxaana ku faraxsanahay in aan aragno waxa uu sannad-dugsiyeedkani xambaarsan yahay!

Salaan wacan,

**Claire Boylan, Carter Seifert, iyo Anna Bovy**
Xubnaha Hoggaanka Golaha Ardayda ee Edina

# Macluumaad Guud

## Hadafka Dugsiyada Dadweynaha ee Edina

Dugsiyada Dadweynaha ee Edina waa bulsho waxbarasho oo firfircoon taasoo bixisa waxbarasho heersare ah una diyaarisa ardayda oo dhan inay garowsadaan kartidooda buuxda.

Iyada oo loo marayo tacliin, waxqabadyo, iyo fursado, waxaanu dhiirigelinaa hal-abuur, kobcinaa xiisaha, waxaana horumarinaa xirfadaha hab-u-fikirka qotoda dheer. Waxaanu taageernaa safarka waxbarasho ee arday kasta anagoo abuurayna dhaqan dugsi oo daryeela isla markaana loo dhan yahay oo taageera ardayga idil ahaantiisa.

## Hiigsiga Dugsiyada Dadweynaha ee Edina

Mid kasta iyo arday kasta inay ogaadaan awoodahooda ayna kobcaan.

## Macluumaadka Siyaasadda

Dhammaan siyaasadaha degmada waxaa laga heli karaa Buug-gacmeedka Siyaasadda Degmada. Marka laga yimaado siyaasadaha ku jira iyo/ama lagu tilmaamay buug-gacmeedkan, ardayda waxaa laga filayaa inay ka warqabaan ayna u hoggaansamaan dhammaan siyaasadaha degmada. Ardaydu waa inay fiiro gaar ah u yeeshaan siyaasadaha ku jira Qaybta 500, taas oo si gaar ah u khuseysa ardayda. Su'aalaha ku aadan siyaasadaha waxaa lagu hagaajin karaa maamulaha dhismahaaga.

Siyaasadda degmada ee hadda waxaa laga yaabaa in wax laga beddelo sanad dugsiyeedka oo dhan. Haddii luqadda buug-gacmeedkan ku qoran wakhti ay noqotaba ay ka hor imaanayso siyaasadaha rasmiga ah ee guddiga dugsigu ansixiyay, khilaaf kasta oo noocaas ah waxaa lagu xallin doonaa si waafaqsan luuqadda siyaasadda sida ugu dambayntii loo ansixiyay. Shuruudaha siyaasadda waxaa sidoo kale xukuma shuruudaha qaanuunka ee dhaqangalka ah wakhtiga ay khuseyso.

## Liiska Shaqaalaha

Kooxda Hoggaanka ee Dugsiga Sare ee Edina
Fasallada 9-12

### Paul Paetzel

**Maamulaha**
Iimayl
(952) 848-3899

### Jenn Carter

**Kaaliyaha Maamulaha**
Iimayl
(952) 848-3806

### William Britt

**Kaaliyaha Maamulaha**
Iimayl
(952) 848-3805

### Michael Pretasky

**Kaaliyaha Maamulaha, Farshaxanka**
Iimayl
(952) 848-3140

### Troy Stein

**Kaaliyaha Maamulaha, Ciyaaraha Fudud**
Iimayl
(952) 848-3825

### Jeff Pope

**Hormuudka Maamulka**
Iimayl
(952) 848-3218

### Liiska Shaqaalaha

Liinki

## Halkee Ayaan Caawimo Ka Raadsadaa Dugsiga Sare ee Edina?

| Adeegga | Halka La Aado |
|---|---|
| Warbixinta Shilka | Xafiiska Caafimaadka |
| Kalandarka Ciyaaraha | hornets.edinaschools.org |
| Uqalmitaanka Ciyaaraha | mshsl.org |
| Su'aalaha Soo Xaadiritaanka | (952) 848-3802 |
| Macluumaadka Baska | (952) 848-4979 |
| Beddelka Ciwaanka | Xafiiska La-taliyaha |
| Macluumaadka Naadiga | Xafiiska Waxqabadyada |
| Macluumaadka Kulleejka | Xarunta Xirfadda Shaqada |
| Talooyinka Kulleejka | La-taliyaha |
| Hawlaha Koorsada | Macalinka |
| Xaaladda Degdegga ah | Xubin Kasta oo Shaqaalaha ah |

| | |
|---|---|
| Kaalmada Dhaqaale/Deeqaha Waxbarasho | La-taliyaha |
| Su'aalaha Buundo-bixinta | Macalinka |
| Shaqada Guriga (Jirro Dheer) | Xafiiska Caafimaadka/La-taliyaha |
| Dhaawac | Xafiiska Caafimaadka |
| Dhibaatooyinka Lookada | Xafiiska Wayn |
| Baadida La Helay | Xafiiska Wayn |
| Buugaagta Daabacan ee Luntay | Xafiiska Wayn |
| Kaalmada Qadada | Xafiiska Adeegga Cuntada ee Chartwells |
| Imtixaanaadka Dib Laga Sameeyo | Macalinka |
| Khariidada Dhismaha | Xafiiska Wayn |
| Kaalmada Nafaqada | Shaqaalaha Bulshada |
| Foomamka Oggolaanshaha u Bixidda Dibedda Dugsiga | Xafiiska Wayn |
| Codsiga Ruqsadda Baakinka | Xafiiska Wayn |
| Shuruudaha Qalin-jebinta | La-taliyaha |
| Macluumaadka Dugsiga Xagaaga | La-taliyaha |
| Beddelka Aqoonsiga Ardayga | Xafiiska Wayn |
| Ganaaxyada Buugaagta Waxbarashada | Macalinka/Xafiiska Wayn |
| Warbixinada Xatooyada | Xafiiska Wayn/Sarkaalka Kheyraadka Dugsiga (SRO) |
| Warqadaha Natiijada (Rasmiga) | Xafiiska La-taliyaha |
| Dugsi Beddelashada | Xafiiska La-taliyaha |

# Macluumaadka Tacliinta iyo Buundada

## Maamuuska Tacliinta

### Liiska Maamuuska (Fasallada 9 - 12)

Ardayda keensata GPA simistar oo dhan 3.5 ama ka badan waxaa lagu dari doonaa Liiska Maamuuska waxaana maamuusi doona Maamulaha marka la gaaro dhammaadka simistar kasta.

### Shahaadada Guusha Waxbarashada ee Edina (Fasallada 9 - 12)

Ardayda joogtaysa GPA guud oo dhan 3.5 ama ka badan waxaa si sanadle ah loogu maamuusi doonaa Shahaadada Guusha Waxbarashada marka uu dhammaado sanad dugsiyeedka.

### Aqoonyahanada Edina

Dhammaan ardayda keensata celcelis dhibco buundo miisaaman/aan miisaanayn oo dhan 3.5 ama ka badan ee dhibcaha laga keensado Dugsiyada Dadweynaha ee Edina ee fasallada 9aad, 10aad, 11aad, iyo simistarka koowaad ee fasalka 12aad waxaa loo aqoonsanayaa Aqoonyahanada Edina. Ardayga ku soo biira Edina inta lagu jiro simistarka koowaad ee fasalkooda u dambeeya oo keensada celcelis dhibco buundo oo dhan 3.5 sidoo kale waa uu u qalmayaa.

| Abaalmarinta | Guusha(Guulaha) |
|---|---|
| Aqoonyahanka Edina | • Isu-gaynta Miisaanka Leh/Miisaanka Lahayn ee GPA Guud: 3.5-3.74 |
| Aqoonyahanka Edina ee Wax Qabtay | • Isu-gaynta Miisaanka Leh/Miisaanka Lahayn ee GPA Guud: 3.5-3.74<br>• Adeeg (1 simistar oo ah wax-baridda asxaabta ama helitaanka warqadda caddeynta adeegga bulshada ee dugsiga EHS) |
| Aqoonyahanka Heerka Sare ee Edina | • Isu-gaynta Miisaanka Leh/Miisaanka Lahayn ee GPA Guud 3.75 (+) |
| Aqoonyahanka Heerka Ugu Sarreeya ee Edina | • Isu-gaynta Miisaanka Leh/Miisaanka Lahayn ee GPA Guud 3.75 (+)<br>• Adeeg (1 simistar oo ah wax-baridda asxaabta ama helitaanka warqadda caddeynta adeegga bulshada ee dugsiga EHS) |

Ardayda dhigata fasalada 9-12 ee leh GPA dhan 3.5 ama ka sarreeya waxaa la maamuusi doonaa simistar kasta iyo si guud.

## Habab Kale oo Kiridhit Looga Helo EHS (Siyaasadda 620)

Dugsiga Sare ee Edina waxaa muddo dheer lagu yaqaanay inuu manhaj hodan ah oo dhammeystiran siiyo ardaydeena. Marar naadir ah, ardayda waxaa laga yaabaa inay qabaan xiiso iyo/ama awoodo ka sarreeya koorsooyinka iyo barnaamijyada badan ee kala duwan ee la heli karo. Iyadoo la doonayo in fursad la siiyo ardayda dhigata fasallada 9-aad ilaa 12-aad ee ku dhiirran inay ku ballaariyaan aqoontooda wax ka baxsan manhajkeena, waxaanu bixinnaa ikhtiyaar wax-barasho oo madax-bannaan.

## Kiridhitka Waxbarasho Hore/Kiridhit Lagu Helo Qiimayn (Siyaasadda 620)

Kiridhit ayaa lagu bixin karaa waxbarasho arday oo ka dhacday deegaan kale oo waxbarasho oo ka baxsan manhajka caadiga ah ee koorsada. Codsiga kiridhitka koorso waxbarasho hore waxaa laga heli karaa Lifaaqa I ee Siyaasadda 620. Foomka waxaa laga heli karaa bogga webseedka Dugsiga Sare ee Edina qaybta ka hoosaysa "Student Support Services (Adeegyada Taageerada Ardayda)" iyo "Forms (Foomamka)." Codsiga wuxuu ku egyahay 45 maalmood kahor bilaabashada koorsada (koorsooyinka sannadka oo dhan iyo kuwa simistarka), natiijooyinkana waxaa la helayaa ugu dambayn 10 maalmood ka hor bilaabashada koorsada. Marki aad dhammeystirto, foomka ku celi la-taliyahaaga.

## Qalin-jebinta Hore (Siyaasadda 613)

Ardayda ayaa loo tixgelin karaa qalin-jebin hore ka dib marka ay buuxiyaan shuruudaha ku xusan siyaasadda degmada dugsiga.

## Imtixaanaadka Ugu Dambeeya

Imtixaanaadka ugu dambeeya waxaa la qaadaa dhammaadka simistar kasta waxayna caadi ahaan ka kooban yihiin 20% ka mid ah buundada simistarka u dambeeya.

## Shuruudaha Qalin-jebinta (Siyaasadda 613)

Arday waa inuu helaa 43 kiridhityo simistar (Fasalka Qalin-jebinaya 2025, 2026, 2027) ee fasallada 9-12 si loo qalin-jebiyo, 44 kiridhityo simistar (Fasalka Qalin-jebinaya 2028+).

| Maadada Loo Baahan Yahay | Kiridhityada Loo Baahan Yahay |
|---|---|
| Ingiriisi | 8 kiridhit |
| Cilmiga Bulshada | 7 kiridhityo (Fasalka Qalin-jebinaya 2026, 2027; 8 kiridhityo Fasalka Qalin-jebinaya 2028+) |
| Xisaab | 6 kiridhit |
| Caafimaadka | 1 kiridhit |
| Waxbarashada Jireed | 2 kiridhit |
| Saynis | 6 kiridhit |
| Farshaxanka | 2 kiridhit |
| Maaliyadda Shakhsiyeed | 1 kiridhit (Fasalka Qalin-jebinaya 2028+) |

## Waxbarashada Lagu Qaato Guriga

Maqnaansho kasta oo cudur-daar leh jirro darteed kaas oo dhakhtarka ku hawlan uu u arko in muddada laga yaabo inay noqoto 15 maalmood oo isku xiga, waa inay waalidiintu la socodsiiyaan la-taliyaha ku habboon si loo bilaabo waxbarashada lagu qaato guriga.

## Waxbarasho Madax-bannaan

### Ka Baxsan Dugsiga EHS (Bannaanka)

Mararka qaar ardayda waxay rabtaa inay iska diiwaangeliso barnaamijyo ka baxsan dugsiga EHS oo ay rabaan inay ka qaataan kiridhit loogu xisaabiyo qalin-jebinta. Kuwani badanaa waa barnaamijyo habaysan oo ay bixiyaan machadyo waxbarasho oo la aqoonsan yahay oo ka caawiya ardayda inay ballaariyaan waxbarashadooda iyo waayo-aragnimadooda (tusaale ahaan, Concordia Language Villages).

### Waaxaha Dugsiga EHS Dhexdooda (Gudaha)

Mararka qaar ardayda waxay u baahan karaan inay kiridhit ku qaataan waxbarasho madax-bannaan iyagoo samaynaya mashruuc ama barasho madax-bannaan iyadoo ay kormeerayaan shaqaale ka tirsan dugsiga EHS.

Arday kasta oo raba inuu kiridhit ka qaato waxbarasho madax-bannaan oo loogu xisaabiyo qalin-jebinta waa inuu dhammaystiro habraaca soo socda ka hor inta aan la gaarin simistarka machadka.

1. Ardaygu helaa foomka codsiga Waxbarashada Madaxa-bannaan, dib-u-eegisna ku sameeyaa baaxadda waxyaabaha laga filayo isagoo la tashanaya la-taliyihiisa. Foomamka waxaa laga heli karaa bogga webseedka Dugsiga Sare ee Edina qaybta ka hoosaysa “Student Support Services (Adeegyada Taageerada Ardayda)” iyo “Forms (Foomamka)”.
2. Ardaygu helaa macallin/la-taliye iyo laba talo oo ka socota dad waaweyn (mid wuxuu noqon karaa macallinka/la-taliyaha) si loo taageero ka-qaybgalka loona hubiyo waxbarasho adag oo ku saabsan Mashruuca Waxbarashada Madaxa-bannaan.
3. Ardaygu dhammeystiraa foomka codsiga Waxbarashada Madaxa-bannaan, isagoo la imaanaya saxiixa waalidka iyo macallinka/la-taliyaha.
4. Ardaygu la kulmaa hoggaanka aagga iyo macallinka/la-taliyaha. Filashooyinka lagu muujinayo waxbarashada lagu qaadanayo kiridhit waxaa lagu go'aamin doonaa laguna cayimi doonaa kulankan.
5. Hoggaanka aagga iyo macalinka la-hawlgalaya ayaa mashruuca u geeya waaxda si ay u aqbasho.
6. Marka waaxdu ay ansixiso, codsiga, oo ay wehliyaan dhammaan shuruudaha gaarka ah iyo waxyaabaha laga filayo ee ku lifaaqan, ayaa loo gudbiyaa maamulaha si uu u bixiyo aqbalaada ugu dambaysa.
7. Marka si guul leh loo dhammeystiro mashruuca Waxbarashada Madaxa-bannaan, macallinka/la-taliyaha ayaa go'aamiya buundada ugu dambaysa.
8. Buundada ugu dambaysa ee waxqabadka Waxbarashada Madaxa-bannaan ayaa natiijada ardayga loo geliyaa sidi diiwaan joogta ah. Buundada laguma xisaabiyo GPA.

## Diidmada Waalidka/Masuulka ee Imtixaanaadka Gobolka oo Dhan ah

Ardayda Dugsiga Sare ee Edina waxay ka-qaybqaataan imtixaanaad badan oo gobolka oo dhan ah. Kuwani waxaa ka mid ah: MCA Reading (ardayda fasalka 10aad), MCA Math (ardayda fasalka 11aad), MCA Science (ardayda ka diiwaangashan Baayolojiga), iyo ACCESS (ardayda uqalantay adeegyada Ardayga Barta Luuqadda Ingiriisiga.

Waalidiinta ama masuuliyiinta waxay ardayda ka reebi karaan imtixaanaadkaan iyagoo adeegsanaya foomkan.

Fadlan booqo bogga webseedka Imtixaanka Ardayga si aad uga hesho xog dheeraad ah ama xafiiska Dugsiga Sare ee Edina kala xiriir (952) 848-3800 ama iimaylka edina.edinahigh@edinaschools.org wixi su'aala ah.

## Xulashooyinka Diiwaangelinta Dugsiga Sare Kadib (Siyaasadda 620)

Ardayda dhigata fasallada sagaalaad, tobnaad, kow iyo tobnaad, iyo laba iyo tobnaad ayaa codsan kara inay iska diiwaangeliyaan barnaamijka Xulashooyinka Is-Diiwaangelinta Dugsiga Sare Kadib (PSEO) iyo barnaamijyo kale oo horumarsan oo aqoonta lagu ballaariyo. Ardayga si lagu qanci kara u dhammeystira koorso ama barnaamij ah xulashooyinka is-diiwaangelinta dugsiga sare kadib (PSEO) ee hoos yimaada sharciga gobolka, oo loo ansixiyay inay buuxinayso shuruudaha qalin-jebinta ee loo baahan yahay, loogama baahna inuu dhammaystiro shuruudo kale oo la xiriira koorsadaas gaarka ah ee waxbarasho. Buundada waxay ka muuqan doontaa waraaqda natiijada waxaana lagu xisaabin doonaa GPA-ga Guud. Liiska koorsooyinka ama barnaamijyada buuxinaya shuruudaha loo baahan yahay waxaa laga heli karaa guddoomiyaha Waaxda Waxbarashada ee Minnesota. Ardayda rabta inay qaadato koorso PSEO ah waa inay la xiriiraan la-taliyaha dugsiga.

## Taageerada/Caawimaada Shaqada Dugsiga

Ardayda waxay haystaan xulashooyin dhowr ah oo loo heli karo in caawimo dheeraad ah laga siiyo shaqada dugsiga.

- La Xiriir Macalinka
- Ka Faa'iidayso Saacadaha Xafiiska ee Macallinka

## Shirarka Macalimiinta

Qoysaska iyo ardaydu waxay heli doonaan fursado ay macallimiinta kula kulmaan habka fogaan-arag ah maalin gaar ah oo loo qoondeeyay simistar kasta. Macluumaadka ku aadan iska qorista shirarka waxaa lagu bixin doonaa iimayl iyo warsidaha dugsiga. Qoysaska sidoo kale inta lagu jiro saacadaha dugsiga waxay macalimiinta ka muddaysan karaan kulamada ay yeelanayaan maalmaha kale wakhti labada dhinac ku wada habboon.

# Filashooyinka/Habraacyada Soo Xaadiritaanka (Siyaasadda 503)

Waa xuquuqda canug kasta inuu joogo dugsiga. Waa masuuliyadda ardayga inuu wakhtigi loogu talagalay xaadiro dhammaan xiisadaha loo qoondeeyay maalmaha dugsigu furan yahay, iyo inuu ka warqabo oo uu raaco habraacyada saxda ah marka uu ka maqan yahay xiisad loo qoondeeyay. Ardayda ayaa ka masuul ah helitaanka shaqadi waxbarasho ee dhaaftay, muddaysashada imtixaanaadka dhaafay, waxaana lagula xisaabtamayaa guditaanka casharadi koorsada ee dhaafay.

Maamulka dugsigu wuxuu raaci doonaa tallaabooyinka hoose iyadoo lagu salaynayo tirada maqnaanshiyaasha cudur-daarka leh/cudur-daar la'aanta ah ee uu ardaygu maqnaa.

Fadlan khadka soo xaadiritaanka kala xiriir (952) 848-3802 ama isticmaal Infinite Campus si aad ugu cudur-daarto arday.

## Maqnaanshiyaasha Cudur-daarka Leh

### Maqnaansho Kasta oo Cudur-daar Leh

Buundo buuxdo ayaa la siinayaa shaqadi dib laga soo gudo. Ardaygu waa inuu DHAMMAAN shaqada ka maqan ku dhammeystiraa muddo ku siman labo maalmood oo dugsi maalin kasta oo maqnaansho oo cudur-daar leh si uu u helo buundo buuxdo.

### 12 Maqnaanshiyo Cudur-daar Leh

Dugsigu wuxuu waalidiinta kala xiriiri doonaa walaacyada uu ka qabo soo xaadiritaanka iyada oo loo marayo wicitaan taleefan ama kulan waalid. Ardayga waxaa laga yaabaa in la geliyo qorshe wax ka qabasho oo u baahan kara oggolaansho hore oo ka socda maamulka/adeegyada caafimaadka ama bixinta qoraal ka socda bixiye caafimaad wixi maqnaanshiyo cudur-daar leh oo dambe.

Degmadu waxay xaq u leedahay inay tebiso maqnaanshahiyaha badan ee ardayda haddii ay gaaraan wax ka badan 12 maqnaanshiyo oo cudur-daar leh.

## Maqnaanshiyaasha Aan Cudur-daarka Lahayn

### Maqnaanshiyaal Kasta oo Aan Cudur-daar Lahayn

Qoyska waxaa lagu ogaysiin doonaa wicitaan taleefan oo otomaatig ah. Qoysku wuxuu haystaa 48 saacadood inuu ugu cudur-daaro maqnaanshaha iyadoo la adeegsanayo nidaamka onlaynka ee EHS ama wicitaan taleefan. Ardaydu waxay fursad u haystaan inay dib ka sameeyaan shaqadi dhaaftay ilaa 75% ama wax u dhigma.

### 3 Maqnaanshiyo Aan Cudur-daar Lahayn

Marka la gaaro saddex maqnaanshiyo oo aan cudur-daar lahayn, waxaa laga rabaa dugsiyada inay warqad ogeysiis ah oo ku saabsan Maqnaanshaha Joogtada ah ee Saddex Maalin guriga ugu diraan waalidiinta/mas'uuliyiinta.

### 7 Maqnaanshiyo Aan Cudur-daar Lahayn

Warbixinta 1aad ee Maqnaansho Joogta ah ayaa laga xarayn doonaa barnaamijka Hennepin County ee “Be@School”. Waalidiinta waxaa looga baahan karaa inay ka-qaybgalaan Kulanka Kooxda Waalidiinta iyagoo adeegsanaya barnaamijka “Be@School”. Marka la gaaro toddobo maqnaanshiyo oo aan cudur-daar lahayn, ardayga waxaa loo aqoonsadaa inuu yahay qof caado ka dhigtay ka maqnaanshaha dugsiga. Dugsigu wuxuu waalidiinta kala xiriiri doonaa walaacyada uu ka qabo soo xaadiritaanka iyada oo loo marayo wicitaan taleefan ama kulan waalid oo ay ku jiraan shaqaalaha dugsiga EHS si loogu abuuro qorshe wax ka qabasho.

### 12 Maqnaanshiyo Aan Cudur-daar Lahayn

Warbixinta 2aad ee Maqnaansho Joogta ah ayaa laga xarayn doonaa barnaamijka Hennepin County ee “Be@School”. Iyadoo ay ku xiran tahay waxa uu keensado ardayga ama xaalado gaar ah, ardayda waxaa laga saari karaa fasalka iyadoo la siinayo buundo NC ah.

## Maqnaanshiyaasha isku Xiga

Marka arday uu maqnaado 15 maalmood oo dugsi oo isku xiga waxaa laga saari doonaa diiwaanka dugsiga. Dib uga diiwaangelinta dugsiga ayaa la tixgelin karaa iyadoo ay ku xiran tahay meesha uu deggan yahay, booska bannaan, iyo duruufaha maqnaanshiyaasha. Qoysasku waa inay la xiriiraan dugsiga marka la filayo ama inta lagu jiro maqnaanshiyaal dhaadheer, ama si ay u codsadaan in dib loo diiwaangeliyo ardayga.

## Maqnaanshaha Joogtada ah

Iyadoo aan loo eegin in maqnaanshiyaasha ay cudur-daar leeyihiin ama aanay cudur-daar lahayn, ardayda maqnaata 10% ama ka badan oo maalmaha dugsiga ah (qiyaastii 18 maalmood sannadkii) waxaa loo arkaa inay yihiin kuwo si joogto ah uga maqnaada dugsiga. Dugsiga EHS wuxuu bilaabi doonaa qorshe taageero marka ardaygu gaaro 5 jeer oo maqnaansho ah halki simistar si looga hortago hoos-u-dhac ku yimaada waxbarashada.

## Soo Daahitaanka

Soo daahitaanku waa imaanshaha dugsiga ama fasalka goordambe, wax aan ka badnayn 10 daqiiqo. Soo daahitaanka, marka laga yimaado xiisadda koowaad ee maalinta, waxaa maareyn doona macalinka. Macalin kasta wuxuu ardayda kala talin doonaa ganaaxyada iyo/ama dib ka samaynta xiisadda. Imaanshaha dugsiga goordambe subixi waxaa la tacaali doona xafiiska. Soo daahitaanka afaraad ee aan cudur-daarka lahayn ee simistar kasta wuxuu keeni doonaa wax ka qabasho (tusaale ahaan, qorshaha soo xaadiritaanka, kulanka waalidka/mas'uulka, kulanka kooxda).

## Xaadiritaanka Daabuurka iyo Munaasabadaha Dhiirrigelinta

Ardayda waxaa laga filayaa inay tagaan daabuurka inta lagu jiro maalinta. Ardayda aan rabin inay tagto daabuurka inta lagu jiro maalinta waa inay tagaan goobta guud ee la isugu yimaado inta lagu jiro daabuurka.

# Waxbarashada Onlaynka ah/Maalmaha Cimilada

## Dugsi Ma Jiro (“Maalinta Barafka” ee Caadada ah)

La isticmaalo saddexda xiritaan ee ugu horreeya ee la xiriira cimilada. Ardaydu dugsi ma leh, mana jiro wax waxbarasho ah oo la siiyo.

Waxa qoysasku ay guud ahaan filan karaan:

- Waxqabadyada K-12 waa la kansalaa
- Go'aamada Ciyaaraha Fudud iyo Hawlaha dugsiga EHS ayaa kala duwanaan kara; go'aamada waxaa qaata kormeeraha guud, maamulaha dugsiga, iyo agaasimaha/la-taliyaha ciyaaraha. Go'aamada waxaa qoysaska ka qaybqaadanaya u gudbiya agaasimaha/la-taliyaha.
- Waxqabadyada waxbarashada bulshada waa la kansalaa

- Xannaanada Kids Club waa ay xiran tahay
- Ma jiraan kooxo bulsho ama kiresyteyaal geli kara dhismayaasha; dhismayaasha waa la xiri doonaa

## Maalinta Waxbarashada Onlaynka ah

Saddex xiritaan kadib (Maalinta 4+), waxbarashada waxaa lagu sii wadayaa guriga si looga hortago carqalad muddo dheer ah. Ardayda waxay hagista iyo waxyaabaha loo diro ka heli doonaan macalimiinta iyadoo loo marinayo bartooda waxbarashada onlaynka ah.

Waxa qoysasku ay guud ahaan filan karaan:

- Dhammaan waxqabadyada K–12 waa la kansalaa
- Go'aamada ciyaaraha fudud iyo hawlaha dugsiga EHS ayaa kala duwanaan kara. Waxaa gaara kormeeraha guud, maamulaha dugsiga, iyo agaasimaha/la-taliyaha ciyaaraha, waxaana si toos ah loogu gudbiyaa qoysaska ka qaybqaadanaya.
- Waxqabadyada waxbarashada bulshada waa la kansalaa
- Xannaanada Kids Club waa ay xiran tahay; Ma jiraan kooxo bulsho ama kiresyteyaal geli kara dhismayaasha; dhismayaasha waa la xiri doonaa

# Tignoolajiyada Elektarooniga ah

## Adeegsiga La Oggol Yahay iyo Kan Aan La Oggolayn (Siyaasadda 524)

### Ujeedada

Degmada dugsiga waxay ardayda marin u siinaysaa gelitaanka nidaamka kombiyuutarka ee degmada, kaas oo ay ku jirto adeegsiga inatarneedka. Ujeedada nidaamka waa mid si aad ah wax gaar ugu ah marka loo eego siinta adeegsiga guud ee intarneedka ee ardayda iyo shaqaalaha. Intarneedka waxaa degmada loogu adeegsan karaa sidi kheyraad waxbarasho. Qoysaska iyo ardayda waxaa looga baahan yahay inay sannad kasta dib u eegaan oo ay ogolaadaan shuruudaha isticmaalka la aqbali karo, si loo xaqiijiyo isticmaalka badbaadada iyo mas'uuliyadda leh ee tignoolajiyadda. Isticmaalayaasha waxaa laga filayaa inay intarneedka isticmaalaan iyagoo adeegsanaya nidaamka degmada si ay u ballaariyaan yoolalka waxbarasho iyo kuwa shakhsiga ah si waafaqsan hadafka degmada iyo siyaasadaha dugsiga. Adeegsiyada laga yaabo in laga aqbalo akoonka shakhsiga ah ee isticmaalaha ee uu ku adeegsado nidaam kale ayaa laga yaabaa in aan laga aqbalin shabakadan ujeedada xaddidan leh. Intaa waxaa dheer, isticmaalka aalad kasta oo dhijitaal ah oo lagu isticmaalo Shabakadda Degmada waxay u baahan tahay ardaydu inay raacaan Siyaasadda 524 ee Dugsiyada Dadweynaha ee Edina (Adeegsiga La Oggol Yahay ee Tignoolajiyada Elektarooniga ah).

## Isticmaalka Taleefanka Gacanta iyo Aaladaha Elektaroonigga ee Shakhsiyeed

Isticmaalka nidaamka degmada dugsiga iyo adeegsiga intarneedka waa mudnaan, ma ahan xuquuq. Dugsiyada Dadweynaha ee Edina waxay ardayda dugsiga sare siiyaan fursad ay dugsiga ku keeni karaan aalad shakhsiyeed, oo ay ku jiraan taleefannada gacanta, si ay ugu isticmaalaan qalab waxbarasho ahaan. Isticmaalka aaladahaan waxay ku xirnaan doontaa go'aanka macalinka.

- Ardaydu waa inay heshaa oggolaanshaha macalinka ka hor inta aanay isticmaalin aalad shakhsiyeed inta lagu guda jiro casharka fasalka.
- Isticmaalka aalad uu leeyahay ardaygu waa in aanay u baahan in wax loo diyaariyo ama taageero farsamo.
- Isticmaalka ardayga ee aalad shakhsiyeed waa inay taageertaa hawlaha wax-baridda ee hadda ka socda fasal kasta iyo sheybaar kasta. Isticmaalka aalad uu leeyahay ardaygu waa inuusan carqaladeyn kala dambaynta fasalka ama uusan sababin dhib aan loo baahnayn.
- Ardaydu waa inay demisaa oo ay meel dhigaan aalad shakhsiyeed marka uu macallinku sidaasi ka codsado.
- Codka waa in la xiraa, ama sameecadaha dhegaha la isticmaalaa.
- Wax aalado elektaroonig ah laguma isticmaali karo deegaanka lagu galo imtixaanka iyadoo aan oggolaansho laga haysan macalinka. Deegaanka imtixaanka oo lagu isticmaalo aalad aan la fasixin waxay keeni doontaa luminta buundada imtixaanka iyadoo aan loo eegin in ardaygu dhammaystiray imtixaanka iyo in kale.

## Filashooyinka Fasalka ee Isticmaalka Tignoolajiyadda

Nidaam heerar ah ayaa la hirgelin doonaa xaaladaha ay macallimiintu ardayda ku farayaan inay aalad u isticmaalaan inay ku dhammaystiraan hawlaha fasalka ama ay u oggolaanayaan isticmaalka aalad inta lagu jiro wakhtiga shaqada madaxa bannaan. Ardayda dugsiga sare waxay isticmaali karaan aaladaha elektaroonigga ah ee shakhsiyeed meel ka baxsan fasalkooda iyagoo raacaya dhaqamada muwaadinimada dhijitaalka ah ee la dejiyay.

### Heerka 1

Aaladaha waa in lagu keydiyaa looko, boorsada dhabarka, boorsada gacanta, iwm., oo aan la arki karin laguna isticmaalin fasalka. Tani waa filashada caadiga ah ee laga filayo fasallada oo dhan.

### Heerka 2

Iyadoo ku xiran go'aanka macalinka, ardaydu waxay aalad u isticmaali karaan in ay ku dhammaystiraan hawl waxbarasho oo gaar ah.

### Heerka 3

Macalinka ayaa bixin kara oggolaansho lagu isticmaalo aalad inta lagu jiro wakhtiga shaqada madaxa bannaan (tusaale ahaan, dhageysiga muusigga iyadoo la isticmaalayo sameecadaha dhegaha la gashado), iyadoo laga filayo ardaydu inay muujiyaan dhaqan wanaagsan oo ku saabsan isticmaalka dhijitaalka ah.

## Si Khaldan u isticmaalka Tignoolajiyadda

### Jebinta Koowaad

Macalinku wuxuu ardayga xusuusin doonaa inuu meel iska dhigo aaladda xilliga fasalka.

### Jebinta Labaad

Macallinku wuxuu ardayga ka qaadayaa aaladda inta ka dhiman xiisadda fasalka wuxuuna wacayaa ama iimayl u dirayaa waalidka/qofka mas'uulka ka ah ardayga. Ardayga waxaa dib loo siinayaa aaladda marka ay dhammaato xiisadda.

### Jebinta Saddexaad

Macalinka ayaa qaadaya aaladda wuxuuna gaynayaa xafiiska wayn. Maamulaha dugsiga ayaa wici doona guriga si uu codsado in aaladda uu qaado waalidka/qofka mas'uulka ka ah ardayga.

### Jebinta Afaraad

Maamulaha, waalidka/mas'uulka iyo ardayga ayaa kulmaya si ay u diyaariyaan heshiis ku saabsan aaladda iyo qorshe horay loogu amba qaado.

## Khataraha Amniga ee Aaladda

Aaladaha dhijitaalka ah ee shakhsiyeed waa kuwo si gaar ah ugu nugul lumidda iyo xatooyada. Aaladaha elektaroonigga ah waa kuwo bartilmaameed u ah in la xado dugsiga dhexdiisa, barxadaha dugsiga, iyo basaska dushooda. Inkastoo xatooyada badankeeda laga yaabo in laga helo faa'iido marka la gado aaladda, waxaa sii kordhaya tirada dadka xada aaladaha oo si gaar ah u beegsanaya xogta xasaasiga ah ee laga yaabo inay ku jirto. Ardayda waxaa lagu booriyaa inay goorhore sii qaadaan tallaabooyin lagu ilaalinayo ammaanka hantida shakhsiyeed ee la keeno dugsiga.

- Dugsiyada Dadweynaha ee Edina ma qaataan masuuliyadda hantida shakhsiyeed ee ay dugsiga keenaan ardayda. Tani waxaa ka mid ah aaladaha dhijitaalka ee shakhsiyeed.
- Ardayda doorata inay aalad keenaan dugsiga waxay qaadanayaan masuuliyadda buuxda ee aaladda. Aaladaha la xado ama waxyeellooba waa masuuliyadda ardayga iyo waalidkiisa ama dadka masuulka ka ah.
- Haddii aalad meel keligeed looga tago waxaa qaadi doona shaqaalaha oo gayn doona Xarunta Warbaahinta ama Xafiiska Guud.
- Ardaydu waa inaysan kuwa kale u oggolaan inay galaan aaladooda shakhsiyeed, xitaa haddii ardayga kale uu xaq u leeyahay inuu ka galo aaladiisa shakhsiyeed.

## Xeerka Anshaxa Onlaynka (Siyaasadda 524)

Dugsiyada Dadweynaha ee Edina, waa muhiim in macluumaadka iyo tiknoolajiyadda loo isticmaalo siyaabo ammaan ah, sharci ah, oo mas'uuliyadi ku jirto. Sidoo kale, degmada dugsigu waxay rabtaa inay ardaydeenu nidaamkeena uga tagaan iyagoo leh raad dhijitaal ah oo wanaagsan.

Waxaanu u qaabilnaa xaaladahaan sidi qaybo muhiim ah oo ka mid ah muwaadinimada dhijitaalka waxaana ku dadaalnaa inaan ardayda ka caawino inay horumariyaan raad dhijitaal oo wanaagsan.

1. Ardayda adeegsanaysa ama isticmaalaysa aaladaha elektaroonigga ah, oo ay ku jiraan balse aanay ku koobnayn baloogyada, wikis, bodhkastiyada, goobta shaqada ee Google, iyo nidaamyada maaraynta waxbarashada degmada ee loogu talagalay hawlaha ardayda ayaa looga baahan yahay inay macluumaadka shakhsi ahaaneed ka ilaaliyaan qoraallada ay soo dhigaan. Heerka dugsiga sare, waalidiinta/mas'uuliyiinta waxay dooran karaan inay u oggolaadaan ardaydooda inay adeegsadaan magacooda oo buuxa si ay u kordhiyaan raadkooda dhijitaalka ah ee wanaagsan marka ay wax u soo dhigayaan dhagaystayaal dhab ah.
2. Ardayda waxay dooran doontaa magacyo onlayn ah oo habboon waxayna ku dadaali doonaan in macluumaadka iyo sawirada ay soo dhigaan onlaynka ay yihiin kuwo ku habboon heerka da'da.
3. Ardaydu kuma geli doonto shabakadda, aaladaha, ama tignoolajiyadaha kale ee waxbarashada iyagoo iska dhigaya arday kale oo ay isku fasal yihiin.
4. Ardayda isticmaalaysa aaladaha elektaroonigga ah waxay ula dhaqmi doonaan aaladahaas sidii goob fasal. Hadalka aan ku habboonayn fasalka dhexdiisa kuma habboona aaladaha elektaroonigga ah. Ardayda waxaa laga filayaa inay onlaynka ixtiraam kula dhaqmaan dadka kale iyo fikradahooda.
5. Hawlaha loo diro in lagu sameeyo aaladaha elektaroonigga ah waxay la mid yihiin hawl kasta oo kale oo dugsiga lagu sameeyo. Ardayda, xagga dhammeystirka hawsha loo diray, waxaa laga filayaa inay u hoggaansamaan xeerarka iyo habraacyada ku xusan buug-gacmeedka ardayga, oo ay ku jiraan kuwa khuseeya koobiyeynta shaqada dadka kale, daacadnimada dhanka waxbarashada, iyo adeegsiga habboon ee tignoolajiyadda.
6. Baloogyada ardayda, boggaga webseedyada, iyo aaladaha kale ee wax lagu allifo waa inay noqdaan madal ay ardaydu ku cabbiraan fikradahooda; hase yeeshee, marka ugu horreysab waa qalab waxbarasho. Degmadu waxay u xaddidi kartaa hadalka sababo waxbarasho oo ansax ah dartood sida lagu qeexay siyaasadda guddiga dugsiga.
7. Ardaydu uma isticmaali doonaan intarneedka, marka ay ku samaynayaan hawlaha uu u diray macalinka, inay dadka kale ku dhibaateeyaan, ku takooraan, u xoog sheegtaan, ama ku khatar geliyaan ammaankooda. Haddii ardayda ay faallo kusoo gaarto aalad elektaroonig ah oo lagu isticmaalo dugsiga taasoo aanay soo dhaweyn ama ku dareemaan ixtiraam-darro, waa inay arrintan u sheegaan macallin ama xubin kale oo shaqaalaha ka tirsan oo la isku hallayn karo waana in aanay ka jawaabin faalladaas. Dhaqanka ardayga ee ka dhaca bannaanka dugsiga, balse xiriir la leh deegaanka dugsiga, ayaa loo cuskan karaa in tallaabo edbin ah looga qaado dugsiga. Tani waxaa si gaar ah ugu jira hawlaha ka dhaca bannaanka dugsiga ee lagu sameeyo intarneedka, baraha bulshada, ama lagu sameeyo wada xiriirada kale.
8. Ardayda adeegsanaysa aaladaha elektarooniga ah iyagoo jooga guriga ama dugsiga, iyagoo isticmaalaya qalabka dugsiga, lama soo degi doonaan wax softiweer ah iyagoo aan oggolaansho haysan mana ku dhufan doonaan xayaysiimaha ama liinkiyada aan la aqoon.
9. Ardaydu waa inay ahaadaan daacad, caddaalad, oo ay muujiyaan daacadnimo iyo hufnaan marka ay ururinayaan, fasirayaan, ayna gudbinayaan macluumaadka si ay faa'iido ugu ahaato dadka kale. Marwalba aqoonso ilaha oo tijaabi saxnaanta macluumaadka ka socda ilaha oo dhan.
10. Ardayda waxay ula dhaqmi doontaa macluumaadka, ilaha macluumaadka, mowduucyada, asxaabta, iyo dadka isticmaala macluumaadka sidi dad mudan ixtiraam. Ururinta iyo gudbinta macluumaadka waa inaysan marna waxyeello u geysan ama khatar gelin qof ama koox dad ah. Ardayda waxay oggolaansho ka heli doonaan ardayda ama shaqaalaha ay diiradda u saaran tahay cilmi baaristooda, waxa ay duubayaan, ama wax soosaarkooda.

11. Ardaydu waxay masuuliyad ka saaran tahay akhristeyaashooda, dhageysteyaashooda, iyo kuwa daawanaya, iyo midba midka kale. Garwaaqso khaladaadlka oo u sax si degdeg ah. Kashif macluumaadka iyo dhaqamada ka baxsan anshaxa ee dadka kale.
12. Isticmaalayaasha dib uma boostigarayn karaan ama dib uma diri karaan macluumaad isticmaalaha loogu soo diray si gaar ah iyada oo aan la helin oggolaanshaha qofkii sameeyay waxyaabahaas.
13. Siyaasadaha guddiga ee khuseeya isticmaalka la aqbali karo ee tignoolajiyada elektarooniga ah waxaa ka mid ah isticmaalka qalabkan elektaroonigga ah oo loo isticmaalo hawlaha dugsiga.
14. Ku guuldarraysiga in la raaco xeerkan anshaxa waxay horseedi doontaa ganaaxyo tacliimeed iyo/ama tallaabo anshax-marin ah.

## Xaddidaadda Mas'uuliyadda

Adeegsiga nidaamka degmada dugsiga waxaa masuuliyaddiisa leh isticmaalaha laftiisa. Nidaamka waxaa lagu bixiyaa qaab ah "sida uu yahay, sida lagu heli karo". Degmadu mas'uul kama noqon doonto wixii waxyeello ah ee soo gaara isticmaalayaasha, oo ay ku jiraan, balse aanay ku koobnayn, lumitaanka, waxyeellada, ama helitaan la'aanta xogta lagu kaydiyay adeegyada kalowdhka (cloud services) ee degmada, cajaladaha, hard drive-yada, ama saafarada; ama dib-u-dhacyada ama isbeddelada ama carqaladaha ku yimaada adeegga ama gaarsiinta khaldan ama gaaritaan la'aanta macluumaadka ama agabka, iyadoo aan loo eegin sababta keentay. Degmadu masuul kama ahan saxnaanta ama tayada wixii talo ama macluumaad ah ee lagu helay ama lagu kaydiyay nidaamka degmada. Degmadu mas'uul kama noqon doonto waajibaadka maaliyadeed ee ka dhasha isticmaalka aan la oggolayn ee nidaamka degmada ama Intarneedka.

# Macluumaadka Buundo-bixinta

## Buundo-bixinta (Siyaasadda 618)

Horumarka tacliinta waxaa lagu buundeeyaa nidaam buundo oo ah A ilaa F. Buundooyinka xarfaha ah waxaa loo isticmaalaa in lagu bixiyo guusha waxbarasho inta badan fasallada. Dhowrka koorso ee qaab buundo kale ah la adeegsado, ardayda iyo waalidiinta waxaa horay loogu wargelin doonaa habraaca uu macallinku isticmaali doono.

## Xarfaha Buundooyinka iyo Qiimayaasha (Miisaanka Lahayn) (Siyaasadda 618)

Buundooyinka xarfaha ah ee ku taxan xagga hoose ayaa lagu qoraa kaararka warbixinta iyo diiwaannada natiijooyinka. Lambarada la socda waxay u taagan yihiin qiimaha dhibcaha ee fasallada aan ahayn kuwa Meelaynta Sare waxaana loo adeegsadaa xisaabinta kala-sarreynta fasalka ee aan la miisaamin.

| **Xarafka** | A | A- | B+ | B | B- | C+ | C | C- | D+ | D | D- | F |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|

| GPA | 4.0 | 3.667 | 3.333 | 3.0 | 2.667 | 2.333 | 2.0 | 1.667 | 1.333 | 1.0 | 0.667 | 0.0 |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|

## Xarfaha Buundooyinka iyo Qiimayaasha (Miisaanka Leh) (Siyaasadda 618)

Buundooyinka xarfaha ah ee ku taxan xagga hoose ayaa lagu qoraa kaararka warbixinta iyo diiwaannada natiijooyinka. Lambarada la socda waxay u taagan yihiin qiimaha dhibcaha ee fasallada Meelaynta Sare leh waxaana loo adeegsadaa xisaabinta kala-sarreynta fasalka ee la miisaamo.

| Xarafka | A | A- | B+ | B | B- | C+ | C | C- | D+ | D | D- | F |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| GPA | 4.8 | 4.4 | 4.0 | 3.6 | 3.2 | 2.8 | 2.4 | 2 | 1.6 | 1.2 | 0.8 | 0.0 |

## Beddelista Buundada

Ardayda D+ ama ka hoose ka keenta xiisad loo baahan yahay waxay dib ugu celin karaan koorsada iyadoo loo marayo barnaamijka la aqoonsan yahay ee la shaqeeyo (EHS ama NSO). Marka la tixgelinayo xulashadan ardaydu waa inay si toos ah ula shaqeeyaan waalidkooda/mas'uuliyiintooda, macallinkooda, iyo la-taliyaha loo qoondeeyay si ay u fahmaan dhammaan saameynta mustaqbalka. Marki koorsada dib loo qaatay si guul ah loo dhammeystiro, buundada cusub ayaa ka soo muuqan doonta warbixinta natiijada waxbarashada, halka buundadi hore warbixinta natiijada loogu beddeli doono NG.

## Cusboonaysiimaha Tebinta Buundada

Xilliyada gudbinta waa ay ku kala duwanaan karaan dhererka sanad dugsiyeed ilaa sanad dugsiyeedka xiga. Horumarka ardayga waxaa lagu gudbiyaa Schoology. Ardayda iyo waalidiinta waxaa laga filayaa inay ka warqabaan buundooyinka socda inta lagu jiro sanad dugsiyeedka.

## Tilmaamaha Dib Ka Samaynta Shaqada (Siyaasadda 503)

Maqnaansho kasta wuxuu ardayga kaga baahan doonaa dib ka samaynta shaqadi dhaaftay. Ardayda waxaa loo oggolaan doonaa labo maalin oo dugsi ee maalin kasta oo maqnaansho inay ku dhammeystiraan hawlihi la diray ee dhaafay. Ardayda leh maqnaanshiyaasha aan cudur-daarka lahayn waxay dib ka samayn karaan shaqadi dhaaftay wax aan ka badnayn buundada C (75%).

- Ardayga ayaa mas'uul ka ah inuu la kulmo macallimiinta si uu u bilaabo dib ka samaynta hawlaha.
- Haddii ay dhacdo maqnaansho muddo dheer ah, ardayga waxaa la siin doonaa 10 maalmood oo uu dib uga sameeyo wixi dhaafay kadib markii uu dugsiga ku soo laabto.
- Haddii ay dhacdo jirro muddo dheer ah marka la gaaro dhammaadka simistarka, darajada “Incomplete” (I) ayaa la siin doonaa.

## Dib Ka Samaynta Waxyaabaha Aan Dhammeystirnayn (Siyaasadda 618)

Ugu badnaan saddex toddobaad ka dib dhammaadka muddada gudbinta ee simistarka ayaa ah wakhtiga kama dambaysta ah ee dib laga samaynayo dhammaan shaqadi la iska rabay simistarki hore haddii aan heshiis gaar ah lala gelin macallinka.

## Codsiga Buundada Baasay/Kiridhit La'aan (Siyaasadda 618)

Ardayda waxay dooran karaan inay qaabka buundada ee hal maaddo oo xulasho ah u beddelaan P/NC simistar kasta. Waa in go'aankan lagu gaaraa isla markaana xafiiska talo-bixinta lagu wargeliyaa ugu dambeyn toddobaadka 9aad ee simistarka. Wakhtiga kama dambaysta ah ee lagu dhammeystirayo foomkan ee simistarka koowaad waa 15-ka Oktoobar, iyo 27-ka Maarso ee simistarka labaad. Foomka waxaa laga heli karaa bogga webseedka Dugsiga Sare ee Edina qaybta ka hoosaysa "Student Support Services (Adeegyada Taageerada Ardayda)" iyo "Forms (Foomamka)".

- Xulashadan buundo-siinta looma oggola koorsooyinka loo baahan yahay qalin-jebinta, Meelaynta Horumarsan (AP), ama Kulleejka lagu sii Dhigto Dugsiyada (CIS).
- Isbeddelo lama samayn doono kadib marka arday uu doorto inuu koorso u qaato buundada P/NC uuna gudbiyay foomka.

Fadlan buuxi macluumaadka oo dhan. Iimayl ayaa loo diri doonaa macallinka, la-taliyaha, iyo waalidka(waalidiinta)/mas'uulka(masuuliyiinta). La tasho macalinkaaga, waalidiinta/masuuliyiinta, iyo/ama la-taliyaha ka hor inta aadan go'aansan inaad qaadato koorso ah P/NC, maadaama ay taasi saameyn ku yeelan karto fursadaha mustaqbalka.

# Adeegyada Caafimaadka

Wixi macluumaad dheeraad ah, booqo webseedka Caafimaadka iyo Fayo-qabka.

Kalkaaliyaha Dugsiga ee Shatiga Haysta (LSN), oo uu caawinayo Kaaliyaha Adeegga Caafimaadka (HSA), ayaa bixiya adeegyada soo socda si loo taageero ardayda iyo shaqaalaha Dugsiga Sare ee Edina.

- Wuxuu bixiyaa talo-bixin iyo qiimeyn dhanka caafimaadka ah
- Wuxuu kor u qaadaa caafimaadka iyo fayo-qabka ardayda oo dhan
- Wuxuu diyaariyaa qorshayaal caafimaad oo loogu talagalay ardayda qaba xaalado caafimaad
- Wuxuu isku-dubbaridaa ka-hortagga iyo xakamaynta cudurrada la kala qaado
- Wuxuu horumariyaa nidaam ku saabsan gargaarka koowaad, habraacyada kalkaalinta, iyo daryeelka xaaladaha degdegga ah
- Wuxuu dadka u gudbiyaa ilaha iyo adeegyada bulshada
- Wuxuu bixiyaa daawada la oggolaaday
- Wuxuu habeeyaa diiwaannada tallaalka wuxuuna hayaa diiwaannada caafimaadka

## Habraacyada Xafiiska Caafimaadka

### Maqnaanshiyaasha

Lambarka soo xaadiritaanka ka wac (952) 848-3802. Fadlan Kalkaaliyaha Dugsiga ee Shatiga Haysta ka wac (952) 848-3075 haddii canugaagu uu muddo dheer ka maqnaan doono dugsiga sababo la xiriira jirro, qalliin, ama xaalado kale oo caafimaad.

Fadlan ogow: Jirrooyinka sida Caabuqa Cunaha, Mononucleosis, xiiq-dheerta, iyo hergabka waa in loo sheegaa xafiiska caafimaadka.

### Gargaarka Koowaad iyo Jirrada Dugsiga

Haddii ardayga uu ku jirrado dugsiga uuna u baahdo inuu aado guriga, shaqaalaha Adeegyada Caafimaadka ayaa isku dayi doona inay la xiriiraan waalidka/qofka mas'uulka ka ah. Qofka lala xiriiro xaaladaha degdegga ah ayaa lala xiriiri doonaa haddii waalidka/qofka mas'uulka ka ah aan la heli karin.

Arday LOOMA oggolaan doono inuu ka baxo dugsiga iyadoo aan lala xiriirin qof qaangaar ah. Fadlan la socodsii xafiiska caafimaadka wixii isbeddelo ah ee ku yimaada xogta xiriiradaan.

### Daawo-Siinta Ardayga (Siyaasadda 516)

Daawooyinka oo dhan, marka laga reebo kuwa sanka laga jiido, waa in lagu hayaa Xafiiska Caafimaadka.

# Macluumaadka Diiwaangelinta/Muddaynta

## Koorsooyinka Meelaynta Sare ee Laga Bixiyo Dugsiga Sare ee Edina

| Maadada | Koorsooyinka |
|---|---|
| Ingiriisi | Luuqadda iyo Curiska Ingiriisiga ee AP<br>Suugaanta iyo Curiska Ingiriisiga ee AP |
| Xisaab | Istaatiitikiska AP<br>Kalkulaasta Hore ee AP<br>AP Kalkulaas AB<br>AP Kalkulaas BC |
| Saynis | Baayolojiga AP<br>Kimistiriga AP<br>Sayniska Deegaanka ee AP<br>Fiisikiska 1 ee AP<br>Fiisikiska C ee AP: Makaanikada<br>Sayniska Kombiyuutarka Java ee AP<br>Mabaadii'da Sayniska Kombiyuutarka ee AP |
| Cilmiga Bulshada | Taariikhda Mareykanka ee AP<br>Dhaqaalaha AP<br>Culuumta Afrikaanka Mareykanka ee AP<br>Isbarbardhigga Dowladda ee AP<br>Dowladda Mareykanka ee AP<br>Taariikhda Yurubta ee AP |

| | |
|---|---|
| | Juqraafiga Aadanaha ee AP<br>Cilmi Nafsiga AP<br>Taariikhda Adduunka ee AP |
| Luuqadda Adduunka | Luuqadda iyo Dhaqanka Shiinaha ee AP<br>Luuqadda iyo Dhaqanka Faransiiska ee AP<br>Luuqadda iyo Dhaqanka Isbaanishka ee AP |
| Farshaxan | Istuudiyaha Farshaxanka 2D ee AP<br>Istuudiyaha Farshaxanka 3D ee AP |

## Shuruudaha iska Diiwaangelinta Koorsada

Ardayga ayaa iska diiwaangelin kara toddoba koorso, balse waa inuu iska diiwaangeliyaa ugu yaraan lix koorso oo dhibco leh simistar kasta. Ardayga iska diiwaangelinaya lix koorso waa inuu sidoo kale iska diiwaangeliyaa barnaamijka diyaarinta ardayga, caawinta macallinka, ardayga wax-bara asxaabtiisa, ama ikhtiyaar kale hal xiisad maalin kasta.

## Isbeddelada Jadwalka

Sanad kasta, ardaydu waxay ka qaybqaataan hannaan diiwaangelin dhammeystiran oo dhaca bilaha Febraayo iyo Maarso kaas oo lagu go'aamiyo qaybaha koorsooyinka, koorsooyinka la bixinayo, iyo qoondeynta macallimiinta. Isbeddelada jadwalka waxaa loo samayn doonaa oo keliya sababahan soo socda kadib marka diiwaangelintu xiranto.

- Xiisad fasal oo ka bannaan jadwalka
- Maqnaanta shuruudaha qalin-jebinta
- Shuruud hore oo aan la buuxin
- Xiisadda oo lagu beddelo Diyaarinta Ardayga, Caawinta Macallinka, Ardayga Wax-Bara Asxaabtiisa.

## Ka Bixidda Koorsada (Siyaasadda 618, Lifaaqa I)

Ardayda ayaa ka bixi kara koorso kahor dhammaadka toddobaadka 4aad ee simistar kasta iyadoo lagu xusayo diiwaanka waxbarashada ardayga in koorsada laga baxay.

Ardayda ka baxda maaddo kahor dhammaadka toddobaadka afaraad ee simistarka sababo gaar ah dartood ayaa heli kara mid ka mid ah darajooyinka ku xusan xagga hoose. Buundooyinka aan xarfaha ahayn saamayn kuma lahan celceliska darajooyinka. Darajooyinkani waxay ku jiri doonaan diiwaanka joogtada ah ee ardayga ilaa uu ardaygu koorsada dib ugu qaato inta lagu jiro simistar mustaqbalka ah. Darajooyinka buundada aan xarfaha ahayn waa:

- NG – Buundo xaraf ah lama siiyo; buundada NG waa in lagu kabaa warbixino sharraxaad ah oo loo diro waalidka(waalidiinta)/masuulka(masuuliyiinta).
- NC – Kiridhit lama siiyo maadada; buundo xaraf ah lama siiyo.
- P – Buundada lagu siiyo ku baasitaanka xiisadda ee D- ama ka sare; buundo xaraf ah lama siiyo.

Ardayda ka baxda maaddo kadib dhammaadka toddobaadka afaraad ee simistarka waxaa lagu soo rogi doonaa ganaax iyadoo la siinayo darajada "F" taas oo lagu xisaabin doono celceliska darajooyinka. Racfaan ayuu la-taliyuhu u gudbin karaa maamulaha iyadoo lagu salaynayo xaaladba-xaalad, iyadoo xaaladaha gaarka ah lagu darsanayo xisaabta.

## Ku Celinta Maaddo

Ardaygu kuma celin karo koorso si uu ugu helo buundo haddii koorsada uu horay ugu dhammeystiray si guul ah. Wixi laga soo reebayo siyaasadan waa inay helaan oggolaansho hore oo maamul.

# Dhaqanka iyo Anshaxa Ardayga (Siyaasadda 506)

Waxyaabaha laga filayo dhaqanka ardayga waxaa si gaar ah loogu qeexay buug-gacmeedkan iyo Siyaasadda 506. Ardayda iyo waalidiinta waxaa laga filayaa inay akhriyaan oo ay masuul ka noqdaan dhammaan waxa ku qoran dukumiintigan. Meelaha qaar ee dhaqanka ardayga ee mudan in si gaar ah loo iftiimiyo ayaa hoos ku xusan.

## Mamnuucista Xoog Sheegashada (Siyaasadda 514)

Falka xoog sheegashada, oo ay ku jirto xoog sheegashada intarneedka, waa ka mamnuuc goobaha degmada, hawlaha degmada, ama gaadiidka degmada. Waxaa mamnuuc ah dhaqanka xasidnimada iyo naxariis-darrada ah ee la xiriira isirka, midabka, caqiidada, asalka qarannimo, jinsiga, da'da, xaaladda guurka, xaaladda ku aadan helitaanka kaalmada dadweynaha, naafanimada, diinta, dhibaataynta galmada, iyo rabitaanka jinsi iyo aqoonsiga jinsiga, sida lagu qeexay sharciga. Mamnuucistani waxay khusaysaa ardayda, qandaraaslayaasha madaxa-bannaan, macallimiinta, maamulayaasha, iyo shaqaalaha kale ee degmada.

- "Xoog Sheegasho" micnaheedu waa dhaqan leh cabsi-gelin, hanjabaad, xad-gudub ama waxyeello leh kaas oo si cad u ah mid la dhibsado isla markaana:
    1. isu dheellitirnaan la'aan awoodeed oo dhab ah ama muuqata ay ka dhex jirto ardayga ku hawlan dhaqanka mamnuuca ah iyo bartilmaameedka dhaqanka mamnuuca ah, dhaqankuna soo noqnoqdo ama sameeyo qaab taxane ah; ama

2. si weyn oo la taaban karo u carqaladeeyo awoodda ardaygu u leeyahay inuu wax barto, ama uu uga qaybqaato hawlaha ama barnaamijyada degmada, ama uu helo dheefaha, adeegyada, ama mudnaanaha gaarka ah ee degmada, ama awoodda macallinku u leeyahay inuu ardayda wax ku baro jawi ammaan ah.

Ereyga "xoog sheegasho" waxaa si gaar ah ugu jira xoog sheegashada intarneedka, dhaqanka xasidnimada iyo naxariis-darrada ah, iyo ka faa'iidaysiga galmo.

- "Dhaqanka xasidnimada iyo naxariis-darrada ah" macnihiisu waa abuurista jawi waxbarasho oo cadow ah iyadoo la adeegsanayo ulajeeddo ah in waxyeello la geysto iyadoo si ula kac ah loo dhaawacayo mid kale sabab la'aan ama ku lug yeelashada cadaawad xad dhaaf ah ama farxad ka helidda cadaawadda.

Qof kasta oo aaminsan inuu bartilmaameed ama dhibbane u noqday xoog sheegasho ama qof kasta oo haya xog ama aaminsan jiritaanka fal laga yaabo inuu noqdo xoog sheegasho ama fal kale oo ay mamnuucday Siyaasadda 514, waa inuu falalka la tuhunsan yahay si degdeg ah ugu warbixiyaa sarkaal ku habboon oo ka tirsan degmada kaas oo ay siyaasaddu u xilsaartay arrintan. Qofku wuxuu warbixinta xoog sheegashada u gudbin karaa si qarsoodi ah; hase yeeshee, degmadu kuma tiirsanaan karto oo keliya warbixin aan magac lahayn si ay u go'aamiso tallaabooyin edbin ah ama tallaabooyin kale oo wax looga qabanayo arrinta. Foomka Ka Warbixinta Xoog Sheegashada waa Lifaaqa I ee Siyaasadda 514 waxaana laga heli karaa webseedka bogga Qoysaska.

## Waxyaabaha La iska Filayo Maqaayadda

Maqaayadda waxaa si joogta ah loo isticmaalaa maalinta oo dhan. Waa lama huraan in ardaydu nadiifiyaan wixii ay isticmaaleen si loo joogteeyo jawi wanaagsan, nadiif ah, oo deggan oo u wanaagsan ardayda oo dhan. Xoogaa xeerar aasaasi ah ayaa loo baahan yahay maadaama ay jiraan arday badan oo isticmaalaya maqaayadda.

- Iskaashi iyo tixgelin wanaagsan oo loo hayo ardayda kale ayaa la filayaa loona riyaaqaa.
- Ardaydu mar walba waa inay u dhaqanto si habsami leh marka ay safka cuntada ku jiraan iyo inta ay wax cunayaanba.
- Ardayda ayaa mas'uul ka ah inay qaadaan qashinka oo ay dib u celiyaan saxamada iyo qalabka wax lagu cuno marka ay bogaan cuntada.

Si nadiif looga dhigo dugsigeena, ardayda looma oggola inay cunto u qaataan meel ka baxsan meelaha loogu talagalay inay wax ku cunaan.

## Qaybinta Agabka (Siyaasadda 904)

Ardayda waxay xaq u leeyihiin inay aragtidooda ku cabbiraan qoraal ahaan oo ay waxyaabaha daabacan ku qaybiyaan goobaha dugsiga, iyadoo la raacayo tilmaamaha qaybinta ee hoos ku xusan.

- Dhammaan waxyaabaha la qoray iyo/ama la soo dhigay waa inuu saxiixaa maamule.
- Waxyaabaha la qoray waxaa kaliya lagu qaybin karaa maqaayadda iyo meelaha guud ee la isugu yimaado saacadaha 8:00–8:20 a.m. iyo 3:15–3:30 p.m.
- Qaybinta kuma jiri karaan: Suugaanta ku dhisan “Nacaybka” ee lagu weerarayo kooxaha sida qowmiyadda, diinta, iyo/ama isirka, waxyaabaha anshax-xumada ah ama qaawan, waxyaabaha sumcad-dilka ah, waxyaabaha loogu talagalay ujeeddooyin ganacsi, tusaale ahaan xayaysiinta badeecad ama adeeg, waxyaabaha loogu talagalay in lagu qalqaalsado lacag, ama waxyaabaha laga yaabo inay carqaladeeyaan hawlaha fasalka, sababa khalkhal weyn, ama ku xad-gudba xuquuqda dadka kale.
- Waxyaabaha la qaybiyay ee lagu daadiyo meelaha u dhow (hoolka la maro, dhabbayaasha dhinaca wadada, iwm.) waa inay qaadaan dadki qaybiyay waxyaabahaas.
- Boorarka ogeysiisyada waxaa loo diyaariyey inay isticmaalaan kooxaha ardayda ee loo oggolaaday iyo ardayda gaarka ah.
    - Waxyaabaha ay ardaydu ku dhejiyaan boorarka loogu talagalay ogeysiisyada rasmiga ah ee dugsiga ama meelaha kale ee aan loogu talagelin ogeysiisyadaas waxaa laga yaabaa inay meesha ka saaraan shaqaalaha dugsiga.
    - Boorarka ogeysiisyada loogu talagalay ardayda waxaa loo isticmaali karaa hawlaha dugsiga, hawlaha ka baxsan dugsiga, ama arrimaha ay ardaydu guud ahaan xiiseeyaan.
    - Wax kasta oo la soo dhejiyo oo loo arko inay ku xadgudbayaan tilmaamaha guud ee halkan lagu bixiyay waxaa si degdeg ah u saari kara maamulka dugsiga.

Dhammaan ogeysiisyada ama farriimaha ay soo dhejiso ardayda waxay ku xirnaan doonaan xaddidaad cabbir oo macquul ah waxayna yeelan doonaan taariikh wuxuuna dugsigu saari karaa toddoba maalmood kadib si loo hubiyo in si buuxda loo heli karo boorarka ogeysiiska. Calaamadaha iyo boostarada waa in aan lagu dhejin daaqadaha, galalka koobka ama kuwa bandhigga, calaamadaha xaaladaha degdegga ah ama jihaynta ah, ama sagxad kale oo ay waxyeelayn doonaan waxyaabaha lagu dhejiyo.

## Mamnuucista Dullaysiga (Siyaasadda 526)

Dullaysi waxaa lagu qeexaa fal ka dhan ah arday, ama ku qasbidda arday inuu sameeyo fal, kaas oo keenaya khatar weyn oo waxyeello u geysan karta qofka, iyadoo ujeeddadu tahay in ardayga lagu daro ama uu xubin ka noqdo urur arday, ama ujeedadi kasta ee kale. Ma jiro arday ama qof shaqaale ah oo qorsheyn kara, amri kara, dhiirrigelin kara, caawin kara, ama ka qaybqaadan kara dullaysi. Siyaasadan ka dhanka ah dullaysiga waxay khusaysaa dhaqanka ka dhaca gudaha ama dibadda hantida degmada iyo wakhti kasta oo ka mid ah maalinta. Qof kasta oo aaminsan inuu bartilmaameed ama dhibbane u noqday dullaysi ama qof kasta oo haya xog ama aaminsan jiritaanka fal laga yaabo inuu noqdo dullaysi, waa inuu falalka la tuhunsan yahay si degdeg ah ugu warbixiyaa sarkaal ku habboon oo ka tirsan degmada kaas oo ay Siyaasadda 526 u xilsaartay arrintan. Qofku wuxuu warbixinta dullaysiga u gudbin karaa si qarsoodi ah; hase yeeshee, degmadu kuma tiirsanaan karto oo keliya warbixin aan magac lahayn si ay u go'aamiso tallaabooyin edbin ah ama tallaabooyin kale oo wax looga qabanayo arrinta.

Foomka Ka Warbixinta Dullaysiga waa Lifaaqa I ee Siyaasadda 526 waxaana laga heli karaa webseedka bogga Qoysaska.

## War-wareegga

Ardayda waxay masuuliyad ka saaran tahay inay noqdaan deris wanaagsan. Ardaydu waa in aanay isugu imaan goobaha baabuurta la dhigto ama meel kasta oo ku dhegan ama u dhow xeyndaabka dugsiga. Ardayda looma oggola inay war-wareegaan musqulaha, qololka lookooyinka, ama meelaha kale ee aan la ilaalin ee dugsiga.

## Khiyaanada Waxbarashada (Siyaasadda 506)

Khiyaanada waxbarashada waxaa ka mid ah, balse aanay ku koobnayn, qishka leyliyada ama imtixaanada dugsiga, koobiyaynta shaqada dad kale, ama isgarabsashada qarsoodiga ah waana mamnuuc. Tallaabooyinka edbinta waxaa ka mid noqon kara u gudbinta ardayga ee adeegyada ama, xagga dembiyada soo noqnoqda, hakin. Cawaaqib xagga waxbarashada ah ayaa sidoo kale la soo rogi karaa.

Khiyaanada waxbarashada waxaa ka mid ah “Ka Koobiyaynta AI”, falka gudbinta waxyaabo lagu soo saaray AI (sida ChatGPT) oo uu qofku u gudbiyo sidii shaqo asal ah oo isagu leeyahay iyadoo aan oggolaansho cad laga haysan macalinka.

## Saraakiisha Kheyraadka Dugsiga (Siyaasadda 507.5)

Hal ama ka badan oo ah Saraakiisha Kheyraadka Dugsiga (SRO-yo) ayaa joogi kara wakhtiyada kala duwan dugsi kasta oo degmo dhexdiisa. Degmadu waxay heshiis kula jirtaa Magaalada Edina si ay u bixiso adeegyada saraakiisha nabadgelyada ee tababaran ee leh shatiga, inta lagu guda jiro maalinta waxbarashada caadiga ah. Waajibaadka saraakiisha SRO waxaa lagu dejiyay siyaasadda degmada waxaana ka mid ah, balse aanay ku koobnayn, kobcinta jawi dugsi oo wanaagsan iyada oo la dhisayo xiriirro iyo wada-xiriir furan, ilaalinta ardayda, shaqaalaha, iyo dadka soo booqda xarunta dugsiga iyadoo laga ilaalinayo falalka dambiyada, iyo la-shaqeynta sarkaalka maamulka xaaladaha degdegga ah iyo amniga dugsiga ee degmada wixi ku aaddan arrimaha amniga dugsiga. Saraakiisha SRO ma isticmaali karaan xoog ama awoodda xilka ay hayaan si ay u fuliyaan xeerarka ama siyaasadaha dugsiga ama ay uga qaybqaataan hirgelinta edbinta la xiriirta jebinta xeerarka dugsiga.

## Filashooyinka Ciyaartoynimada iyo Habraacyada Dhacdooyinka oo Dhan

Ixtiraamka aasaasiga ah ee dadka, ciyaartoynimo, iyo dhaqamo wanaagsan ayaa la filayaa. Waxaa la filayaa in ixtiraamkan uu gaarsiisan yahay dhammaan dadka xaadirka ah, oo ay ku jiraan ka-qaybgalayaasha, daawadayaasha, iyo saraakiisha/garsoorayaasha.

### Habdhaqanka La Dhibsado

Habdhaqanka la dhibsado, sida foorjeynta, magac-xun ugu wicidda, yasitaanka, luuqadda aan habboonayn, dhaqanka wax ku qasbidda, ama dhaqan kale oo cadaawad ah, waa mamnuuc.

- Dembiga koowaad: Digniin afka ah; Ku xiran qiimeynta heerka habdhaqanka
- Dembiga labaad: Ka saarista dhacdada (7 maalmood oo kalandar), ka joojinta ka-qaybgalka hawlaha Edina
- Dembiga Saddexaad: Ka joojinta sanad buuxa oo laga joojiyo ka-qaybgalka Hawlaha Edina

### Xeerarka MSHSL

Fadlan sidoo kale ogow in xeerarka MSHSL ay mamnuucaan waxyaabaha soo socda:

1. Adeegsiga buunka hawada, firinbiyada, dawanka, waxyaabaha dabka ah ee qarxa, iwm.
2. Adeegsiga boorarka, calaamadaha, ama calamada
3. Tuurista walxaha
4. Joogista goobta tartanka loo qorsheeyay iyadoo lagu sarkhaansan yahay daroogo, oo ay ku jirto khamrada
5. Gelitaanka aan la oggolayn ee tartan kasta oo la qorsheeyay
6. Lebiska iyo/ama dhaqanka aan habboonayn
7. Mudaharaadyada daawadayaasha oo lagu dhigo garoonka lagu ciyaaro, barxadaha, iwm.

FIIRO GAAR AH: Ardayda waxaa laga codsan karaa inay gudbiyaan tijaabada PBT wakhti kasta. Dembiyada waxaa la xanbaarsanaanayaa ciyaar ilaa ciyaar. Ikhtiyaarka go'aanka maamulka ayaa khuseeya xaaladaha oo dhan.

## Lebiska Ardayga (Siyaasadda 504)

Siyaasadani waxay xoojinaysaa waxbarashada ardayda iyadoo dejinayso shuruudo ku saabsan lebiska iyo muuqaalka oo la xiriira ujeeddooyinka waxbarashada, xoojisaa midnimada dugsiga, kor u qaadaa badbaadada ardayda, isla markaana waxay oggolaataa xorriyad-hadal oo habboon. Ardaydu ma xiran karaan:

- Dharka ama agabka muujinaya luuqad ama sawirro rabshad ah.
- Dharka ama agabka muujinaya sawirro ama luuqad muujinaya ama dhiirigelinaya shay kasta ama dhaqdhaqaaq kasta oo sharci darro ah, hadallo nacayb ah, kor u qaadidda kooxaha hanjabaadda/nacaybka oo ay ku jiraan kooxo burcad ah ama kooxo xagjir ah, aflagaado, ama sawirro qaawan. Tani waxaa ka mid ah: sawirada, aqoonsiyada, calaamadaha, astaamaha, ereyada, walxaha ama muuqaalada ku yaalla dharka ama agabka.
- Agabka loo arki karo in ay khatar yihiin, ama loo adeegsan karo hub ahaan ama waxyeello u geysan kara hantida dugsiga.
- Shey kasta oo lagu qariyo wejiga (marka laga reebo marka ay tahay cibaado diimeed) oo ay ku jiraan, balse aanay ku koobnayn, maaskiyada, riinjiga wejiga, ama timo-habaynta.

## Badbaadada Ardayga

Badbaadada ardayga waa mudnaan sare koorsooyinka oo dhan, gaar ahaan kuwa ay ku jiraan hawlaha gacanta lagu qabto, shaqada sheybaarka, waxbarashada jir dhiska, ama deegaannada kale ee laga yaabo inay khatar leeyihiin.

Si loo xaqiijiyo deegaan waxbarasho oo badbaado ah, dhammaan ardayda waxaa laga filayaa inay mar walba u hoggaansamaan tilmaamaha iyo habraacyada loo dejiyay badbaadada.

### Filashooyinka

- Habraacyada Badbaadada: Raacitaanka tilmaamaha ku habboon ee fasalka ee ku saabsan badbaadada
- Agabka iyo qalabka fasalka: Kaliya loo isticmaalo sidi loogu talagalay
- Saaritaanka sheeyaasha: Sheeyaasha waa in aan laga saarin aagga fasalka ee loogu talagalay.
- Habdhaqanka Habboon: Habdhaqanka carqaladeynta leh, taxaddar-la'aanta ah, ama si ula kac ah khatarta u gelinaya badbaadada qofka ama dadka kale looma dulqaadan doono.
- Qalabka Ilaalinta: Ardaydu waa inay xirato qalabka badbaadada ee ku habboon, sida ookiyaalayaasha, galoofisyada gacmaha, ama jaakadaha sheybaarka, halki loo baahdo.
- Habraacyada Xaaladda Degdegga ah: Ardaydu waa inay taqaano oo ay u hoggaansato barotokoolada looga jawaabo xaaladaha degdegga ah haddii ay dhacdo shil ama xaalad khatar ah.

### Cawaaqibta Ku Xadgudubyada

Ku guuldarraysiga u hoggaansanaanta shuruudaha badbaadada waxay keeni kartaa tallaabooyin edbin ah, oo ay ku jiraan balse aanay ku koobnayn:

- Si kumeelgaar ah uga saaridda hawsha ama xiisadda fasalka
- U baahashada tababarka badbaadada ka hor inta aan dib loo bilaabin ka-qaybgalka
- Ogeysiinta waalidka/qofka mas'uulka ka ah
- Si joogta ah uga saarista koorsada haddii xadgudubyadu ay sii socdaan ama haddii hal xadgudub uu khatar weyn ku noqdo badqabka qofka naftiisa ama dadka kale

### Siyaasadda Ka Saarista Fasalka

Go'aanka arday looga saarayo koorso waxaa gaari doona maamulka dugsiga. Ardayga waxaa laga saari karaa koorsada haddii ficiladiisa:

- Si joogto ah u jebiyaan xeerarka badbaadada iyadoo digniino la siiyay
- Ay khatar geliyaan naftiisa ama dadka kale sababo la xiriira dayacaad ama dhaqan-xumo
- Ay muujiyaan inuusan diyaar u ahayn inuu raaco tilmaamaha badbaadada ee lagama maarmaanka ah

## Tubaakada/Qaac-jiidista (Siyaasadda 419)

Ardayda iyo shaqaalaha degmada dugsiga waxay xaq u leeyihiin inay wax ku bartaan oo ay ku shaqeeyaan deegaan xor ka ah tubaakada. Siyaasadda dugsiga waxaa ku xadgudbaya qofkasta oo isticmaala tubaakada, aaladaha la xiriira tubaakada, ama sita ama isticmaalaya aaladaha elektaroonigga ku shaqeeya ee wax lagu nuugo iyadoo falalkaas lagu dhex sameynayo dugsi dadweyne, barxadaha dugsiga, gaadiid kasta oo uu leeyahay dugsiga, ama munaasabadaha iyo hawlaha dugsiga.

Ardaydu ma haysan karto nooc kasta oo ka mid ah tubaakada, aaladaha la xiriira tubaakada, ama aaladaha elektaroonigga ku shaqeeya ee wax lagu nuugo iyadoo falalkaas lagu dhex sameynayo dugsi dadweyne, barxadaha dugsiga, gaadiid kasta oo uu leeyahay dugsiga, ama munaasabadaha iyo hawlaha dugsiga. Arday kasta oo ku xadgudba siyaasadan waxaa lagu qaadayaa edbinta degmada dugsiga.

### Kharribaadda (Siyaasadda 506)

Kharribaadda hanti kasta oo ay leedahay degmada waa mamnuuc. Kuwa ku xadgudba waa la edbin doonaa waxaa loo sheegi karaa saraakiisha laamaha amniga.

### Mamnuucista Hubka (Siyaasadda 501)

Qofna ma haysan karo, ma isticmaali karo, ama ma qaybin karo hub marka uu joogo goob dugsi marka laga reebo sida ay dhigayso siyaasadda degmada dugsiga. “Hub” micnihiisu waa shay kasta, aalad, ama qalab loogu talagalay hub ahaan ama marka la isticmaalo awood u leh khatar gelinta ama geysashada waxyeello jireed ama loo isticmaali karo inuu geysto is-dhaawac oo ay ku jiraan, balse aanay ku koobnayn, hub kasta, ha ahaado mid cabbaysan ama aan cabbaysnayn; qoryaha hawada; qoryaha pellet-ka; qoryaha BB; dhammaan mindiyaha; toorrayda; budadka; biraha wax lagu feero; numbchucks; xidigaha afka leh ee la tuuro, qaraxyada, rashka, buufinta kiimikada iyo walxaha kale ee wax gana; qoryaha korontada; rasaasta; sunta; silsiladaha; fallaaraha; iyo walxaha loo beddelay inay u shaqeeyaan hub ahaan. Hub waxaa sidoo kale ku jira waxyaabaha u eg hubka. Edbin iyo tallaabo ku habboon ayaa laga qaadi doonaa qof kasta oo ku xadgudba siyaasaddan. Degmada dugsiga ma oggola haysashada, isticmaalka, ama qaybinta hubka ee ardayda. Edbinta ardayda waxaa ku jiri doona, ugu yaraan: ka cayrinta degdegga ah ee dugsiga; la-wareegidda hubka; wargelinta degdegga ah ee booliiska; ogeysiinta waalidka ama qofka masuulka ka ah; iyo soo-jeedin loo gudbiyo kormeeraha guud oo ku saabsan in ardayga laga saaro dugsiga muddo aan ka badnayn hal sano. Maamulaha dhismaha wuxuu, sida ugu dhakhsiyaha badan ee macquulka ah, u gudbin doonaa nidaamka cadaaladda dambiyada ama nidaamka ka-hortagga dambiyada dhallinyarada, sidi ku habboon, ardayga si sharci-darro ah dugsiga ugu soo qaata qori. Ardaygi dugsiga keena qori waxaa laga saari doonaa dugsiga muddo ugu yaraan hal sano ah, iyadoo ay ku xiran tahay go'aanka degmada dugsiga ee xaalad kasta gaarkeeda loo eegayo.

## Adeegyada Ardayda

Wixi macluumaad dheeraad ah, booqo bogga webseedka Adeegyada Ardayda.

### Xarunta Kulleejka iyo Xirfadda Shaqada

Xarunta Kulleejka iyo Xirfadda Shaqada waxay maalin kasta u furan tahay isticmaalka ardayda inta lagu jiro sanad dugsiyeedka. Waxaa laga helayaa macluumaad iyo agab waxtar u ah xirfadda shaqada iyo qorsheynta wixii ka dambeeya dugsiga sare. Ardayda waxaa lagu boorinayaa inay bartaan kheyraadka iyo adeegyada ay bixiso Xarunta Kulleejka & Xirfadda Shaqada.

## Qorshaha Helitaanka Luuqadda

Degmadu waxay meelmarisay Qorshaha Helitaanka Luuqadda oo ay ku jiraan habab iyo habraacyo lagu caawinayo ardayda iyo dadka waaweyn ee wax kula xiriira luuqad aan ahayn Ingiriisiga. Qorshahani wuxuu bixinayaa macluumaad ku saabsan xuquuqaha helitaanka adeegga luqadda, qalabka, habraacyada, iyo kheyraadka loo heli karo ardayda, qoysaska, iyo shaqaalaha degmada. Koobiga qorshahan iyo macluumaad dheeraad ah waxaa laga heli karaa bogga Qorshaha Helitaanka Luuqadda ee webseedka.

## La-taliyeyaasha Dugsiga

La-taliyeyaasha waxaa ardayda loogu kala qoondeeyaa alifbeetada waxayna badanaa la sii joogaan isla ardaydaas ilaa ay ka qalin-jebinayaan. La-taliyeyaasha waxay la shaqeeyaan ardayga si ay u qorsheeyaan uguna muddeeyaan koorsooyinka, isla markaana ay u bixiyaan hagista dhanka waxbarashada, xirfadaha, iyo shaqada. Waxay la shaqeeyaan ardayda, waalidiinta, macallimiinta, iyo hay'adaha loo gudbiyo si ay ardayda uga caawiyaan xallinta dhibaatooyinka. La-taliyuhu wuxuu u shaqeeyaa sidi qof u-dooda ardayga xagga xiriirka uu la leeyahay dugsiga, asaagiisa, waalidiinta, iyo hay'adaha dibadda. La-taliyuhu ma jebin doono asturnaanta sirta ilaa ay ku lug leedahay khatar soo wajihi karta ardayga ama dadka kale.

## Shaqaalaha Bulshada ee Dugsiga

Shaqaalaha bulshada ee dugsiga EHS waxay ka shaqeeyaan bixinta adeegyo loogu talagalay ardayda si loo horumariyo waxqabadkooda tacliimeed, loogana caawiyo kor u qaadista fayo-qabkooda dhanka bulshada iyo shucuurta. Waxay sidoo kale qoysaska ku xiraan ilaha bulshada dhexdeeda ah ee gacan ka gaysta taageeriddooda.

# Habraacyada Guud/Macluumaad Kale

## Nidaamka Gudbinta Warbixin Qarsoodi ah – Wax Dheh

Dugsiyada Dadweynaha ee Edina waxay ka-qaybqaataan nidaamka Say Something Anonymous Reporting System, barnaamij badbaadada dugsiga ah oo awood u siinaya ardayda inay aqoonsadaan calaamadaha digniinta ee khataraha imaan kara una sheegaan si qarsoodi ah waxyaabaha ay ka walaacsan yihiin. Ardaydu waxay gudbin karaan talooyin 24 saacadood maalinti, 365 maalmood sanadki iyagoo ku gudbinaya taleefan lambarka 1-844-5-SAY-NOW, iyagoo adeegsanaya aabka moobilka, ama onlaynka halkan. Talooyinka waxaa dib u eega la-taliyayaal u tababaran dhibaatooyinka kuwaas oo la xiriiri doona maamulka dugsiga iyo, haddii loo baahdo, hay'adaha fulinta sharciga. Si ula kac ah u gudbinta talo been ah waa dembi halis ah waxayna keeni doontaa tallaabo edbin ah si waafaqsan buug-gacmeedkan.

## Qorshaha Maareynta Asbestos-ka

Degmada dugsigu waxay soo saartay qorshe lagu maareeyo asbestos-ka. Nuqul ka mid ah qorshahan waxaa laga heli karaa webseedka degmada.

## Boorsooyinka Dhabarka

Ardayda waxaa loo oggol yahay inay boorsooyinka dhabarka la yimaadaan dugsiga. Waxaa si xoog leh loogu talinayaa in ardayda ay adeegsadaan looko la siiyay si ay uga fogaadaan inay maalintii oo dhan dugsiga dhexdiisa ku wataan boorsooyinka dhabarka iyo buugaagta. Ardaydu waa in aanay boorsooyinka dhabarka iyadoo aanan lala joogin uga tagin maqaayadda, meelaha guud ee la isugu yimaado, ama meelaha kale ee dhismaha. Boorsooyinka dhabarka ee aan lala joogin iyo boorsooyinka dhabarka waa la soo qaadi doonaa waxaana la gayn doonaa xafiiska.

## Kalandarka

Dugsiga Sare ee Edina wuxuu raacaa kalandarka degmada Dugsiyada Dadweynaha ee Edina, ku lifaaqan halkan. Fadlan la xiriir xafiiska Dugsiga Sare ee Edina lambarka (952) 848-3800 ama iimayl u dir edina.edinahigh@edinaschools.org wixi su'aala ah.

## Cabashooyinka (Siyaasadda 104)

Ardayda, waalidiinta/mas'uuliyiinta, shaqaalaha, ama dadka kale waxay walaacyada ama cabashooyinka u gudbin karaan degmada dugsiga. Cabashooyinku waxay noqon karaan midkood qoraal ama afka. Dadka waxaa lagu boorinayaa, balse aan qasab ku ahayn, inay cabasho qoraal ah u gudbiyaan heerka dhismaha, halki ay ku habboon tahay. Maamulaha ku habboon ayaa qoraal ugu jawaabi doona qoloda cabanaysa isagoo ka hadlaya jawaabta degmada dugsiga ee ku aaddan cabashadaas.

## Arrimaha Hadal-haynta Dhaliya (Siyaasadda 606-Lifaaqa IV)

Arrimaha hadal-haynta dhaliya waa looga hadli karaa fasalka dhexdiisa haddii la buuxiyo shuruudaha gaarka u ah.

## Maareynta Xasaradda (Siyaasadda 806)

Dugsiyada Dadweynaha ee Edina ayaa adeegsada “Borotokoolka Jawaabta Caadiga ah” (Joogista Qofkasta Meesha uu Joogo, Sugidda Amniga, Albaabo isku Xirista, Daadguraynta, Gabbaadka) xaaladaha degdegga ah, iyadoo diiradda la saarayo tallaabooyin cad oo wax ku ool ah oo loogu talagalay shaqaalaha iyo ardayda. Borotokoolada muhiimka ah waxaa ka mid ah albaabo isku xirista marka ay jirto khatar dhow, sugidda amniga dugsiga marka ay hawl amni ka socoto dugsiga agtiisa, iyo hannaan dib-u-midoobid ah oo qaabaysan oo loogu talagalay siidaynta ardayga iyo waalidka. Qoysaska ayaa la ogeysiiyaa marka tani loo baahdo.

## Dugsi iyo Goob Shaqo oo Ka Caagan Daroogada (Siyaasadda 418)

Haysashada ama isticmaalka khamrada, walxaha la koontaroolo, walxaha sunta ah, xashiishka caafimaadka, xashiishka aan sarkhaanka lahayn, iyo badeecadaha xashiishka la cuni karo waa ka mamnuuc dugsiga ama goob kasta oo kale oo dugsi ka hor, inta lagu jiro, ama ka dib saacadaha dugsiga. Qalabka la xiriira walxaha la koontaroolo ayaa sidoo kale mamnuuc ah. Degmada dugsiga ayaa ciqaabi doonta ama tallaabo ku habboon ka qaadi doonta qof kasta oo ku xadgudba siyaasaddan.

Siyaasadda degmada laguma xadgudbin marka qof uu goob dugsi keeno walax la koontaroolo oo loo isticmaalo daaweyn caafimaad oo la aqoonsan yahay hadda si uu shakhsi ahaan u isticmaalo haddii qofku haysto warqadda dhakhtarku u qoray ee walaxdaas, marka laga reebo marijuwaana taas oo aan laga oggolayn goobta dugsiga, xitaa haddii uu dhakhtar qoray. Ardayda haysta qoraalka dhakhtarka waa inay u hoggaansamaan siyaasadda degmada dugsiga ee ku saabsan "Daawada Ardayga". (Siyaasadda 516) Degmada dugsiga waxay barnaamij waxbarasho ka bixin doontaa dugsi kasta oo hoose iyo mid sare oo ku saabsan balwadda maandooriyaha iyo ka-hortagga ku-tiirsanaanta maandooriyaha.

## Ardayda Siddeed iyo Toban Jirka

Ardayda jirta 18 sano ama ka weyn waa dad qaangaar ah xagga sharciga waxayna leeyihiin dhammaan xuquuqaha iyo waajibaadka sharciga ah ee dadka waaweyn. Marka ay ka diiwaangashan yihiin dugsiga, waa waajib saaran inay u hoggaansamaan xeerarka dugsiga iyo maamulka dugsiga ee dhaqangeliya xeerarkaas. Xagga arrimaha u baahan ogolaanshaha waalidka ee carruurta aan qaan-gaarin, 18-sano-jirrada waa inay raacaan isla xeerarkaas ilaa iyo haddii ay waalidiintooda/masuuliyiintooda ka heleen madax-bannaani sharci ah iyagoo adeegsanaya amar maxkamadeed ayna amarkaas u gudbiyeen maamulka dugsiga.

## Dhoolatusyada Xaaladaha Degdegga ah

Dhismo la'eg Dugsiga Sare ee Edina, waa lagama maarmaan in dhammaan ardaydu ay aqoon u yeeshaan habraacyada xaaladaha degdegga ah. Macalimiinta fasalada ayaa sharrixi doona habraacyada loogu talagalay dhoolatusyada tababarka, waxaana laga filayaa inay dhammaan ardaydu ka qaybqaataan.

## Hubinada Sooyaalka Shaqada (Siyaasadda 404)

Degmada dugsiga waxay soo baari doontaa sooyaalka taariikhda dembi ee dhammaan codsadayaasha dalab shaqo ka hela degmada dugsiga. Degmada dugsiga waxay sidoo kale soo baari doontaa sooyaalka taariikhda dembi ee dhammaan shakhsiyaadka, marka laga reebo ardayda is-xilqaanka ku shaqeysa ee diiwaangashan, kuwaas oo la siiyo fursad ay ku bixiyaan adeegyo tababar ciyaareed ama adeegyo kale oo tababar tacliimeed oo ka baxsan manhajka dugsiga inay ka bixiyaan degmada dugsiga, iyadoon loo eegin in magdhow la bixiyay iyo in kale. Jagooyinkaan waxaa ka mid ah, balse aanay ku koobnayn, dhammaan tababarayaasha ciyaaraha, tababarayaasha hawlaha tacliimeed ee ka baxsan manhajka, kaaliyeyaasha, iyo la-taliyeyaasha. Degmada dugsiga waxay dooran kartaa inay soo baarto sooyaalka taariikhda dembi ee isxilqaamayaasha kale, qandaraaslayaasha madaxa-bannaan iyo shaqaalaha ardayda ah.

## Adeegsiga Loo Siman Yahay ee Tas-hiilaadka Dugsiga (Siyaasadda 801)

Degmada dugsiga waxay samaysay madal furan oo kooban oo loogu talagalay ardayda dugsiga sare inay ku qabsadaan kulamo aan la xiriirin manhajka xilliyada aan casharrada la bixinayn. Degmada dugsiga wax ma ku kala takoori doonto ama ma diidi doonto marin-helka loo siman yahay ama fursad caddaalad ah iyadoo lagu salaynayo waxa ku jira hadalka, ha ahaado mid diimeed, mid siyaasadeed, mid falsafadeed, ama wax kale ee laga jeediyo kulammada noocan ah.

Kulamadaan madasha furan ee kooban waxay noqon doonaan kuwo ikhtiyaari ah oo uu ardaygu bilaabo; ma noqon doonaan kuwo ay maalgelinayaan shaqaalaha ama wakiillada dugsiga; shaqaalaha ama wakiillada dugsigu waxay kulammada diiniga ah goobjoog ka ahaan doonaan oo keliya iyagoon ka qaybqaadanayn; kulammadu ma carqaladayn doonaan habsami-u-socodka hawlaha waxbarasho ee dugsiga dhexdiisa; iyadoona dadka aan dugsiga ka tirsanayn aysan maamuli doonin, xakamayn doonin, ugana qaybgeli doonin si joogto ah hawlaha kooxaha ardayda. Dhammaan kulamada hoos yimaada qodobkan waa inay raacaan habraacyada ay dejisay degmada dugsiga.

## Gaadiidka Hawlaha Ka Baxsan Manhajka (Siyaasadda 713)

Degmada dugsiga waxay ardayda siin kartaa gaadiid ay ku tagaan kagana soo laabtaan hawlaha ka baxsan manhajka. Ilaa heerka degmada dugsiga ay bixiso gaadiidka hawlaha ka baxsan manhajka, degmadu waxay qaadi kartaa lacag ku saabsan gaadiidka ardayda ay ku tagaan kagana soo laabtaan hawlaha ka baxsan manhajka iyo safarrada aqoon kororsiga ah ee ikhtiyaariga ah ee lagu aado meelaha aan dugsiga ahayn.

## Isbeddelada Xaaladaha Qoyska

Waalidiintu waa inay isla markiiba ku wargeliyaan xafiiska Adeegyada Ardayda wixi ku saabsan isbeddel kasta oo ku yimaada ciwaanka ama qaab-dhismeedka qoyska sida kala-tagga, furriinka, ama heshiisyada la xiriira masuul ka noqoshada carruurta.

## Khidmadaha

Waxyaabaha qaybta ka ah barnaamijka waxbarashada aasaasiga ah waxaa lagu bixiyaa lacago ka socda gobolka, federaalka, iyo heerka maxalliga ah kuwaasoo ardayga lagu siiyo si bilaash ah. Ardayda waxaa laga filayaa inay la yimaadaan qalin-qoriyaal, qalin-biiro, warqado, tirtirayaal, buugaagta qoraalka iyo sheeyaasha kale ee shakhsiyeed. Ardayda waxaa looga baahan karaa inay bixiyaan khidmado ama lacag shubis kale oo gaar ah, oo ay ku jiraan (ma ahan liis wax kasta soo koobaya):

- Khidmadaha ama lacagaha laga qaado ka-qaybgalka hawlaha ka baxsan manhajka, halkaasoo ka-qaybgalku uu yahay ikhtiyaari iyo halka khidmadaha ama lacagaha ay tahay ardaygu inuu bixiyo si uu u xaadiro ama uga qaybgalo hawl ka baxsan manhajka ay isku mid u yihiin ardayda oo dhan, iyadoon loo eegin in ardaygu uu ka diiwaangashan yahay dugsi dadweyne ama dugsi guriga lagu barto.
- Kharashka agabka loogu talagalay mashruuc fasal oo ka sarreeya shuruudaha ugu yar isla markaana uu ardaygu haysanayo.
- Lacagta dammaanadda ee loogu talagalay soo celinta agabka, sahayda, ama qalabka.
- Qalabka iyo dharka gaarka ah ee waxbarashada jireed iyo ciyaaraha.
- Sheeyaasha gaarka loo isticmaalo ama alaabaha ardaygu ikhtiyaar u haysto inuu iibsado sida daabacaadaha ardayga, faraantiyada fasalka, buugaagta xusuusta sanadlaha ah, iyo ogeysiisyada qalin-jebinta.
- Safarrada aqoon kororsiga ah ee loo arko inay dheeraad ka yihiin barnaamijka waxbarashada ee degmada.
- Khidmadaha ama lacagaha lagu galo ama looga qaybqaato hawlaha ama barnaamijyada ka baxsan manhajka ee ikhtiyaariga ah.

- Caymiska caafimaadka iyo shilka ee ardaygu u iibsado iskiisa.
- Isticmaalka qalabka muusigga ee ay leedahay ama ay soo kiraysatay degmada dugsiga.
- Koorsada tababarka waxbarashada darawalka ama mootada ee ay degmada dugsigu taabageliso.
- Gaadiidka lagu tago loogana soo laabto dugsiga ee ardayda ku nool labo mayl gudahood masaafo u jirta dugsiga.
- Gaadiidka ardayda ee lagu tago loogana soo laabto hawlaha ka baxsan manhajka ee ikhtiyaariga ah ama waxbarasho dugsiga sare kadib ah oo lagu bixiyo meelo aan dugsiga ahayn.

Ardayda waxaa laga qaadi doonaa kharashka buugaagta daabacan, buugaagta shaqada, buugaagta maktabadda, iyo qalabka ee lumay ama waxyeelloobay. Haddii buugaagta/agabka aan la keenin dhammaadka simistarka ama sanad dugsiyeedka hadba sidi loo baahdo, khidmad ayaa la gelin doonaa Infinite Campus waxaana waalidiinta iyo ardayda loo diri doonaa iimayl xusuusin ah. Degmada dugsiga ayaa iska dhaafi karta khidmad ama lacag-dhigis la iska rabo haddii ardayga iyo waalidka/mas'uulka aysan awoodin inay bixiyaan. Wixi macluumaad dheeraad ah, la xiriir xafiiska guud ee dugsiga ardaygaaga.

## Ururinta Lacagaha (Siyaasadda 629)

Dhammaan hawlaha ururinta lacagaha ee ay sameeyaan kooxaha ardayda iyo ururada iyo/ama kooxaha waalidiinta waa inay marka hore helaan oggolaanshaha kormeeraha dugsiga. Kaqaybgalka hawlaha ururinta lacagaha ee uusan dugsigu ansixin waxay xadgudub ku tahay siyaasadda degmada dugsiga. Qalqaalada ardayda ama shaqaalaha ee ardayda ee ku aadan hawlo aan la xiriirin dugsiga lama oggolaan doono inta lagu jiro maalinta dugsiga.

## Cuntada & Cabbitaanada Fasallada Dhexdooda

Pop, juusta, iyo cuntada lagama oggola fasallada dhexdooda. Ardayda waxay biyo ku haysan karaan fasallada ilaa macalin uu u diido. Waxyaabaha ka daata Pop, juusta, iyo cuntada waxay gacan ka gaystaan wasakhda roogga iyo deegaan aan nadiif ahayn oo ay ku jiraan ku dhalashada jiirka. Pop, juusta, iyo cuntada waa in kaliya lagu isticmaalaa maqaayadda ama meelaha kale ee loogu talagalay.

## Hadiyadaha Shaqaalaha (Siyaasadda 421)

Degmada dugsiga waxay garowsan tahay in ardayda, waalidiinta/mas'uuliyiinta, iyo dadka kale laga yaabo inay rabaan inay mahadcelin u muujiyaan shaqaalaha degmada. Degmada, si kastaba ha ahaatee, waxay ka digaysaa hadiyad-siinta shaqaalaha waxayna dhiirigelinaysaa warqadaha iyo qoraallada mahadnaqa ama waxyaabo yaryar oo mahadcelin ah. Qof shaqaale ah ma qalqaalsan karo, ma aqbali karo, ama ma heli karo, middood si toos ah ama si dadban, hadiyad ka socota arday, waalid/mas'uul, ama shaqsi ama urur kale oo ka badan qiimaha xaddidan. Kormeeraha guud ayaa leh go'aanka waxa uu yahay qiimaha “xaddidan.”

## Xafladda Qalin-jebinta

Ka-qaybgalka ardayga ee xafladda qalin-jebinta waa mudnaan, ma ahan xuquuq. Ardayda buuxisay shuruudaha qalin-jebinta ayaa loo oggol yahay inay ka qaybgalaan xafladaha qalin-jebinta, marka laga reebo haddii ka-qaybgalka loo diido sababo ku habboon, oo ay ka mid noqon karto arrimo la xiriira anshaxa. Hawlaha qalin-jebinta waxaa gacanta ku haya oo kala wada maamulaha(maamulayaasha) dhismaha.

## Ka-hortagga Dhibaateynta iyo Rabshadda (Siyaasadda 413)

Degmada dugsiga waxay ku dadaashaa inay joogtayso deegaan waxbarasho iyo shaqo oo ka caagan dhibaateyn iyo rabshad ku salaysan isir, midab, caqiido, diin, asal qaran, jinsi, aqoonsiga jinsiga, da'da, xaaladda guurka, xaaladda qoyska, xaalad ku aadan qaadashada kaalmada dadweynaha, rabitaanka jinsi, ama naafanimada. Degmada dugsiga waxay mamnuucday nooc kasta oo ah dhibaateyn ama rabshad ku salaysan isir, midab, caqiido, diin, asal qaran, jinsi, aqoonsiga jinsiga, da'da, xaaladda guurka, xaaladda qoyska, xaalad ku aadan qaadashada kaalmada dadweynaha, rabitaanka jinsi, ama naafanimada. Foomka Ka Warbixinta Takoorka, Dhibaateynta, iyo Rabshadda waxaa laga heli karaa bogga webseedka Qoysaska.

## Kaararka Aqoonsiga

Arday kasta waxaa la siin doonaa kaar aqoonsi ah oo ay ku jiraan sawir, baarkoodh, iyo xogta kale ee aqoonsiga. Waa lagama maarmaan in la wato kaarkan mar kasta inta lagu jiro hawlaha dugsiga. Macalimiinta ama kormeerayaasha waxay ardayda ka codsan karaan inay tusaan kaarkaas ujeedooyin aqoonsi dartood; waxaana loo baahan yahay in lagu galo dhammaan xafladaha qoob-ka-ciyaarka. Kaararka lumo waxaa lagu beddeli doonaa khidmad dhan $5.

## Tallaalada (Siyaasadda 530)

Ardayda oo dhan waa inay bixiyaan caddeyn tallaal ama ay soo gudbiyaan dukumiintiyo ku habboon oo ka dhaafaya tallaalladaas si ay isaga diiwaangeliyaan ama ay ugu sii jiraan diiwaangelintooda. Ardayda ayaa laga dhaafi karaa shuruudda tallaalka marka tallaalka ardayga aan la samayn karin sababo caafimaad dartood; marka ay jirto xaqiijin sheybaar oo muujinaysa inuu jiro difaac ku filan; ama sababo la xiriira caqiidooyin ay si dhab ah u aaminsan yihiin waalidiinta/mas'uuliyiinta ama ardayga. Degmada dugsiga waxay hayn doontaa fayl ay ku jiraan diiwaanada tallaalka ee arday kasta oo dhigta degmada dugsiga ugu yaraan shan sano kadib marka ardaygu gaaro da'da 18 sano jir. Si aad u hesho nuqul ka mid ah jadwalka dugsiga ama u hesho foomka ka dhaafitaanka ama xog, la xiriir kalkaaliyaha caafimaadka ee dugsiga.

## Kormeerrada iyo Baaritaanada (Siyaasadda 502)

Dugsiyada Dadweynaha ee Edina ardayda uma oggola inay lookooyinka, miisaska, ama baabuurkooda u isticmaalaan ujeeddooyin aan la oggolayn ama inay ku kaydiyaan alaab mamnuuc ah. Intaa waxaa dheer, ardaydu waxyaabo mamnuuc ah kuma qaadan karaan ama kuma dhex haysan karaan alaabtooda gaarka ah inta ay ku sugan yihiin dhulka degmada ama inta lagu guda jiro dhacdooyin ay taabagelisay degmada ama uu taabageliyay dugsiga.

- Saraakiisha dugsiga ayaa eegi kara gudaha lookooyinka iyo miisaska sababti ay noqotaba wakhti kasta, ogeysiin la'aan, iyada oo aan la helin oggolaansho arday, iyo iyada oo aan la haysan amar lagu baaro.
- Marki sarkaal dugsi uu hayo sabab macquul ah oo uu uga shakiyo in baaris ay daaha ka rogi doonto ku xadgudubka sharciga, siyaasadda degmada, ama xeerarka dugsiga, sarkaalka dugsigu wuxuu baari karaa alaabta gaarka ah ee ardayga, gaarigiisa, ama ardayga jirkiisa. Baaristu waxay noqon doontaa mid macquul ah xagga baaxadeeda iyo faro-gelinteeda.

## Siyaasadda Casharada Waxbarasho (Siyaasadda 606)

Degmada dugsiga waxay bixin doontaa hannaan ay qoysaska degmada iyo/ama xubnaha bulshada ku codsadaan eegista qaar la soo xulay oo ka mid ah qoraallada waxbarashada iyo/ama agabka waxbarashada. Imtixaanaadka la jaangooyay iyo imtixaanaadka ay diyaariyaan macalimiinta ee aan weli la qaadin, waa inay qarsoonaadaan, sidaas darteedna lama eegi karo.

## Wareysiyada Ardayda ee ay Sameynayaan Hay'ado Dibedda ah (Siyaasadda 519)

Waxaa jira marar ay dad aan ahayn saraakiisha iyo shaqaalaha degmada dugsiga ay lagama maarmaan u arkaan inay la hadlaan arday inta lagu guda jiro maalinta dugsiga. Badbaadada ardayga iyo carqaladaynta barnaamijka waxbarashada ayay ka walaacdaa degmadu. Wareysiyada ardayda ee ay sameynayaan hay'ado dibedda ah guud ahaan ma ahan kuwo la oggol yahay sida ku qeexan Siyaasadda Guddiga Dugsiga ee 519.

## Tijaabinta Macdanta Rasaasta (Lead) ee Ku Jirta Biyaha La Cabbo

Dugsiyada Dadweynaha ee Edina waxay taariikh ahaan soo samayn jireen, ayna sii wadaan inay sameeyaan, tijaabinta Macdanta Rasaasta (Lead) ee Ku Jirta Biyaha La Cabbo sida lagu tilmaamay talooyinka Waaxda Caafimaadka ee Minnesota ee “Yaraynta Macdanta Rasaasta (Lead) Ku Jirta Biyaha La Cabbo: Hagis Farsamo oo loogu talagalay Dugsiyada Minnesota” iyo shuruudaha Xeerka Minnesota 121A.335. Qofkasta oo danaynaya in lagala hadlo barnaamijka ama natiijooyinka Macdanta Rasaasta (Lead) ee Ku Jirta Biyaha La Cabbo ee degmada wuxuu la xiriiri karaa Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee degmada si uu u helo dukumiintiyada.

## Qadada iyo Quraacda

Degmadu waxay kala shaqaysaa Chartwells inay bixiso xulashooyin cunto oo caafimaad qaba oo loogu talagalay ardayda oo dhan. Cuntooyinka waxaa lagu diyaariyaa laguna bixiyaa National School Lunch Program (Barnaamijka Qadada Dugsiyada ee Qaranka), waxayna Edina qayb ka tahay Minnesota Free School Meals Program (Barnaamijka Cuntada Dugsiga ee Bilaashka ah ee Minnesota).

Ardayda oo dhan waxaa fursad loo siiyaa inay helaan **hal quraac oo bilaash ah** iyo **hal qado oo bilaash ah** maalin kasta. Si ay u helaan qadada bilaashka ah, ardaydu waa inay saxankooda ku haystaan ugu yaraan saddex (3) kooxood oo cunto oo kala duwan, waxayna dooran karaan ugu badnaan shan (5) kooxood. Mid ka mid ah cuntooyinkaan waa inuu ahaadaa ½ koob oo miro ama khudaar ah. **Xulashooyinka cuntada ee gaarka loo iibsado sida cuntada fudud ama cabitaanada aan ka ahayn caanaha, iyo cuntooyinka labaad ama caanaha dheeraadka ah, dhammaantood waa in lagu bixiyaa lacag laga bixinayo akoonka cuntada ee ardayga.**

Akoonada cuntada, oo ay ku jiraan taariikhda wax-iibsiga iyo xulashooyinka maalgelinta, ayaa laga heli karaa Infinite Campus. Ardayda waxay u baahnaan doonaan inay geliyaan PIN-ka akoonkooda si ay wax cunto ah uga helaan maqaayadda.

Ardaydu waxay dooran kartaa inay qado ka soo qaataan guriga. Si loo joogteeyo deegaan dugsi oo badbaado ah, qadada looma oggola in dugsiga ay soo gaarsiiyaan ururo dibadda ah (sida DoorDash ama adeegyo la mid ah). Waalidiinta/masuuliyiinta waa laga aqbalaa inay qadada ardaygooda u dhigaan xafiiska guud. Waxaanu codsanaa in qoysaska kaliya ay qadada u keenaan ardaygooda(ardaydooda) oo aysan u keenin ardayda kale.

Qadada waa in lagu cunaa oo kaliya meelaha loogu talagalay. Wakhtiyada qadada waa ay ku kala duwan yihiin fasalka iyo heerka fasalka. Ardayda waxaa maalinta koowaad ee dugsiga la ogeysiin doonaa wakhtiga loo qoondeeyay qadadooda.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijka cuntada ee degmada, oo ay ku jiraan liisaska cuntada, qiimayaasha cuntada gaarka loo iibsado, iyo sida lacago loogu shubo koontada cuntada ee ardayga, fadlan ka eeg bogga webseedka ee Adeegyada Cuntada iyo Nafaqada.

## Caymiska Daawada/Caafimaadka/Shilka (Siyaasadda 534)

Degmada dugsiga ma bixiso caymiska daawada, caafimaadka, ama shilalka ee ardayda. Haddii arday uu galo shil, uu jirrado, ama uu dhaawacmo isagoo jooga dugsiga ama ka-qaybqaadanayo hawl ay taabogelisay degmada, qoysasku waxay u baahan doonaan inay isticmaalaan qorshayaashooda caymiska si ay u bixiyaan kharash kasta oo la xiriira (tusaale ahaan, daryeelka caafimaadka, gaadiidka xaaladaha degdegga ah, iwm.). Dhammaan su'aalaha la xiriira caymiska ku hagaaji Agaasimaha Adeegyada Ganacsiga.

## Hawlaha Ardayda ee Aan La Taabagelin (Siyaasadda 628)

Ardayda qabta su'aalo ku saabsan ururada ardayda waa inay la kulmaan agaasimaha hawlaha ama kormeeraha.

A. Hawlaha ardayda ee aan la taabagelin waa ururada, kooxaha, bulshooyinka, iyo/ama kooxaha walaaltinimada ee aanay aqoonsanayn degmada dugsigu, isla markaana aan buuxin shuruudaha loo dejiyay hawl dugsi oo la taabageliyo.
B. Hawlaha ardayda ee aan la taabagelin waa kuwa ay xubnahoodu inta badan ka kooban yihiin arday ka tirsan dugsi degmo, oo ay taabageliyaan dad aan ahayn shaqaalaha dugsiga, kuwaas oo saacadaha ka baxsan saacadaha dugsiga ku kulma meel ka baxsan dugsiga, isla markaana dejista yoolal aan ahayn kuwa waxbarasho. Hawlahani waa ay ka baxsan yihiin awoodda maamulka dugsiga. Xubnaha waxay u adeegsan karaan tas-hiilaadka degmada si waafaqsan Siyaasadda 801 – Adeegsiga Loo Siman Yahay ee Tas-hiilaadka Dugsiga
C. Xubin ka noqoshada qarsoodiga ah ee kooxaha walaaltinimada ragga, walaaltinimada haweenka iyo/ama naadiyada waa mamnuuc degmada dhexdeeda. Intaa waxaa dheer, hawlaha lidka ku ah danta ugu wanaagsan ee dugsiga ama si xun uga tarjumaya sumcadda dugsiga ama faragelinaya hadafka waxbarasho ee aasaasiga ah ee dugsiga waa mamnuuc.

## Takoor La'aanta (Siyaasadaha 103, 521, 522, 528)

Degmada dugsiga waxaa ka go'an waxbarasho loo dhan yahay iyo bixinta fursad waxbarasho oo ay u wada siman yihiin ardayda oo dhan. Degmada dugsiga ma samayso takoor ku salaysan isir, midab, caqiido, diin, asal qaran, jinsi, xaaladda guurka, xaaladda waalidnimo, xaalad ku aadan helitaanka kaalmada dadweynaha, naafanimada, rabitaanka jinsi, oo ay ku jiraan aqoonsiga iyo muujinta jinsiga, ama da'da marka ay fulinayso barnaamijyadeeda iyo hawlaheeda. Guddiga dugsiga wuxuu u xilsaaray Sonya Sailor, Agaasimaha Fulinta ee Shaqaalaha, inay noqoto sarkaaladda xuquuqda aadanaha ee degmada si ay u maamusho wixii su'aalo ah ee la xiriira arrimaha ka hortagga takoorka:

**Sonya Sailer**
**Agaasimaha Fulinta ee Shaqaalaha**
sonya.sailer@edinaschools.org
(952) 848-4911

Foomka Ka Warbixinta Takoorka, Dhibaateynta, iyo Rabshadda waxaa laga heli karaa bogga webseedka Qoysaska.

## Ogeysiinta Habdhaqanka Rabshadda Leh ee Ardayda (Siyaasadda 529)

Degmada dugsiga waxay ogeysiis siin doontaa macallimiinta iyo shaqaalaha kale ee ku habboon ee degmada dugsiga ka hor inta aan ardayda taariikhda u leh habdhaqanka rabshad wata la gayn fasalladooda. Kahor inta aan ogeysiiska la siin, mas'uuliyiinta degmadu waxay waalidka ama qofka masuulka ka ah ardayga ku wargelin doonaan in ogeysiiska la bixin doono. Waalidiinta/masuuliyiinta ardayga waxay xaq u leeyihiin inay dib u eegaan oo ay ka horyimaadaan diiwaannada ilmahooda, oo ay ku jirto xogta diiwaangelinaysa taariikhda habdhaqanka rabshadda wata.

## Xaqa Waalidku u Leeyahay inuu Ogaado

Haddii waalid uu codsado, degmada dugsiga waxay siin doontaa macluumaad ku aadan aqoonta xirfadeed ee macallimiinta fasalka ee ilmahooda, oo ay ku jiraan, ugu yaraan, waxyaabaha soo socda:

- In macallinku buuxiyay shuruudaha gobolka ee ku saabsan aqoonta iyo shatiga looga baahan yahay heerarka fasallada iyo maadooyinka uu macallinku dhigo;
- In macallinku wax ku barayo xaalad degdeg ah ama ruqsad kale oo ku meelgaar ah taasoo laga dhaafay shuruudihii gobolka ee u-qalmitaanka ama qaadashada shatiga;
- In macallinku uu wax ku barayo takhasuska uu shahaadada ka haysto;
- In ardaygu ay adeegyo siiyaan caawiyeyayaasha xirfadeed iyo, haddii ay sidaasi tahay, aqoontooda.

Intaa waxaa dheer, degmada dugsiga waxay waalidiinta siin doontaa macluumaad ku saabsan heerka guusha uu ilmuhoodu ka gaaray mid kasta oo ka mid ah imtixaannada tacliimeed ee gobolka. Degmada dugsiga waxay waalidiinta ogeysiin doontaa haddii ilmahooda loo qoondeeyay, ama muddo afar toddobaad ah ama ka badan oo isku xiga, uu wax baray macallin aan buuxin shuruudaha shahaadada ama ruqsadda ee gobolku dejiyay ee khuseeya heerka fasalka iyo maadada uu macallinku dhigayo.

## Ogeysiiska Adeegsiga Sunta Cayayaanka

Dugsiyada Dadweynaha ee Edina waxay adeegsadaan shirkad qaabilsan adeegga xakamaynta cayayaanka oo shati haysata isla markaana xirfad u leh si looga hortago loona xakameeyo jiirka, cayayaanka, iyo noocyada kale ee dhibaatada geysta, kuwaas oo laga fulinayo gudaha iyo hareeraha dhismayaasha degmada. Barnaamijkooda wuxuu ka kooban yahay:

- Kormeerka iyo la socodka si loo go'aamiyo inay cayayaano jiraan iyo in wax daawo ah loo baahan yahay;
- Talooyinka dayactirka iyo nadaafadda si loo ciribtiro cayayaanka iyadoo aan loo baahan kiimikooyinka cayayaanka lagu dilo;
- Adeegsiga tallaabooyinka aan kiimikada ahayn sida dabinada, xiridda daldaloolada iyo baarista; iyo
- Adeegsiga waxyaabaha lagu xakameeyo cayayaanka ee ka diiwaangashan hay'adda EPA marki loo baahdo.

Saameynta caafimaad ee muddada dheer ah ee ay ku leeyihiin carruurta ee ka soo gaaraysa adeegsiga waxyaabaha lagu xakameeyo cayayaanka si buuxda looma fahmi karo. Dhammaan waxyaabaha lagu xakameeyo cayayaanka waxaa loo doortaa laguna isticmaalaa si waafaqsan tilmaamaha ku qoran sida uu dhigayo sharciga federaalku.

Qiyaasta jadwalka kormeerada xakamaynta cayayaanka iyo daaweynta suurtagalka ah ee cawska ayaa loo heli karaa dib-u-eegis. Waalidiinta ardayda waxay gudbin karaan codsi ay ku helayaan ogeysiin hore oo ku aadan isticmaal kasta iyagoo wacaya maamulaha dugsiga ama Waaxda Dhismayaasha iyo Dhulalka lambarka (952) 848-3999. Xaashiyaha Xogta Badbaadada ee dhammaan sunta cayayaanka iyo dhirta ee la adeegsado waxaa dib-u-eegistooda laga heli karaa iyadoo la wacayo Waaxda Dhismayaasha iyo Dhulalka.

## Ballan-qaadka Daacadnimada (Siyaasadda 531)

Ardaydu waxay akhrin doonaan Ballan-qaadka Daacadnimada ee calanka Mareykanka toddobaadkiiba halmar mid ka mid ah xiisadaha tooska ah ee dugsiga. Qofkasta oo aan rabin inuu ka qaybqaato akhrinta Ballan-qaadka Daacadnimada sababti ay noqotaba ayaa dooran kara inuusan akhrin. Ardaydu waa inay ixtiraamaan xaqa uu qofkale u leeyahay inuu sidaas doorto. Ardaydu waxay sidoo kale heli doonaan tilmaanta qaabka saxda ah, sida saxda ah ee loo soo bandhigo, iyo sida loo ixtiraamo calanka.

## U Sii-deynta Diiwaanada ee Dadka Kale (Siyaasadda 515)

Degmada dugsiga waxay xogta ka socota diiwaanka ardayga la wadaagi doontaa oo kaliya dadka uu sharciga federaalku u oggolaaday inay helaan macluumaadkaas iyadoo la raacayo xaddidaadaha uu dejiyay sharciga federaalku.

## Deeqaha Waxbarashada iyo Kaalmooyinka Deeqda ah

Deeqaha waxbarashada ee qaranka, gobolka, iyo kuwa maxallig ah iyo barnaamijyada kale ee kaalmada dhaqaale ayaa ay heli karaan ardayda uqalmi karta. Ardayda danaynaysa deeqaha waxbarashada ama noocyada kale ee kaalmada dhaqaale waa inay la xiriiraan la-taliyahooda xilli hore sanadkooda u dambeeya.

## Habraacyada Xiritaanka Dugsiga (Siyaasadda 807)

Dugsiga ayaa la baajin karaa marka kormeeraha guud uu aaminsan yahay in cimilo aad u daran ama xaalado kale ay khatar gelinayaan badqabka ardayda iyo shaqaalaha. Kormeeraha guud wuxuu go'aamin doonaa xilli hore oo maalinta ah ilaa inti macquul ah wixi ku saabsan xiritaanka dugsiga ama dhismayaasha dugsiga. Ogeysiisyada xiritaanka dugsiga waxaa lagu bixin doonaa farriin cod oo otomaatig ah, iimayl, qoraal, webseedka degmada, iyo iyadoo loo marinayo warbaahinta maxalliga ah. Si aad u hesho xog faahfaahsan, fadlan booqo boggeena Xaaladaha Degdegga ah ee Cimilada iyo Xiritaanada Dugsiga.

## Warbaahinta uu Taabageliyo Dugsiga (Siyaasadda 512)

La-taliyayaasha warbaahinta ee ardayda ayaa kormeeri doona ardayda saxafiyiinta ah si loo xaqiijiyo u hoggaansanaanta sharciga iyo siyaasadaha degmada dugsiga. Ardayda soo saaraysa warbaahinta uu taabageliyo dugsiga kana qaybqaadanaysa hawlaha dugsiga dhexdiisa ah waxaa kormeeri doona la-taliyaha warbaahinta ardayda iyo maamulaha dugsiga. Waxa lagu soo bandhigayo warbaahinta uu taabageliyo dugsiga ama hawl uu taabageliyo dugsiga marka waxa la gudbinayo:

1. uu fuxshi ku yahay ilmaha aan qaangaarin;
2. uu yahay sumcad-dil;
3. uu yahay aflagaado, dhibaateyn, hanjabaad, ama cabsi gelin;
4. uu yahay duullaan aan loo baahnayn oo lagu qaadayo asturnaanta sirta;
5. uu ku xadgudbayo sharciga federaalka ama gobolka;
6. uu keenayo carqalad weyn oo la taaban karo oo ku timaadda hawlaha dugsiga;
7. ay ujeeddadiisu tahay kicinta ama sababidda fal sharci-darro ah oo degdeg uga dhici kara gudaha dugsiga ama ku-xadgudubka siyaasadaha ama xeerarka sharci ee dugsiga;
8. Lagu xayaysiiyo ama lagu dhiirrigeliyo badeeco ama adeeg aan sharcigu u oggolayn carruurta aan qaangaarin;
9. uu u doodo dhibaateyn galmo, isir, ama diineed ama rabshad ama fikrad khaldan; ama
10. la qaybiyo ama la soo bandhigo iyadoo lagu xadgudbayo xeerarka la xiriira wakhtiga, goobta, iyo qaabka loo samaynayo.

Waxa lagu soo bandhigayo warbaahinta uu taabageliyo dugsiga ama hawl uu taabageliyo dugsiga waxay hoos tagtaa maamulka iyo kormeerka degmada dugsiga ee dhanka qaabka iyo nuxurka marka tallaabooyinka degmadu ay si macquul ah ula xiriiraan walaacyo sharci ah oo ku saabsan habka wax-baridda. Warbaahinta uu taabageliyo dugsiga waxaa lagu qaybin karaa wakhtiyo iyo goobo macquul ah.

## Diiwaanada Ardayga (Siyaasadda 515)

Diiwaan la isu geeyay ayaa loo hayaa arday kasta. Diiwaanada noocan ah waxaa loo isticmaali karaa oo kaliya danaha, horumarinta, ama wanaagga ardayga. Diiwaanada waxaa ku jira xogta shakhsiga iyo qoyska, xogta imtixaanada, oo ay ku jiraan kartida iyo xiisaha, warbixinnada caafimaadka, warbixinnada indho-indhaynta, diiwaannada shirarka, nuqullada waraaqaha waalidiinta iyo kuwa kale ee ku saabsan ardayga, iyo dhammaan diiwaannada guusha, sida ay go'aamiyaan imtixaannada iyo qiimeynta macallimiinta.

## Ra'yi Ururinada Ardayga (Siyaasadda 520)

Ra'yi ururinada ardayga waxaa loo qaadi doonaa qaab aan magac lagu xusin, ilaa waalidiinta/masuuliyiinta ardayga lagu ogeysiiyo qoraal mooyee in jawaabaha ra'yi ururinta ardayga ay tahay in lagu aqoonsado magacyada ardayda, oo la siiyo waalidiinta/mas'uuliyiinta fursad ay kaga baxaan ka qayb qaadashada ra'yi ururinta. Ma jirto shuruud in ardaygu soo celiyo ra'yi ururinta, mana jiro diiwaan ardaygu leeyahay oo soo celinta ra'yi ururinta lagu hayn doono. Ra'yi ururinada ay ku jiraan su'aalo ku aadan ardayga ama waalidka(waalidiinta) ama masuulka(masuuliyiinta) ardayga waxa ay shakhsi ahaan u aaminsan yihiin ama dhaqamada galmada, nolosha qoyska, anshaxa, iyo diinta, lagama qaadi doono ardayna ilaa waalidka ama qofka mas'uulka ka ah ardayga lagu ogeysiiyo qoraal ahaan in ra'yi ururinta noocan ah la sameynayo isla markaana uu waalidka ama qofka mas'uulka ka ah ardayga uu bixiyo ogolaansho qoraal ah oo u oggolaanaya ardayga inuu ka qaybqaato ama fursad uu uga haro ra'yi ururinta iyadoo taasi ay ku xiran tahay sida loo maalgeliyay ra'yi ururinta.

Mid kasta iyo dhammaan dukumiintiyada ay ku jiraan oggolaanshaha qoraalka ah ee waalidka ee u oggolaanaya ardayga inuu ka qaybqaato ra'yi ururin waxay degmada dugsiga ku hayn doontaa fayl ka gaar ah jawaabaha ra'yi ururinta

## Macluumaadka Ka-hortagga is-dilka

Ardayda iyo qoysasku waxay heli karaan caawimo wakhti kasta. Wac ama qoraal u dir 988 si aad ula xiriirto Khadka Caawimada Ka-hortagga is-dilka & Xasaradda ee 988. Si aad ula xiriirto Khadka Qoraalka ah ee Xasaradda, qoraalka HOME u dir 741741. Gudaha Hennepin County, adeegyada xasaradda ee guurguura ee maxalliga ah ayaa la heli karaa 24 saac maalinti lambarka 612-596-1223. Haddii ay jirto xaalad degdeg ah oo ku aadan badbaadada, wac 911.

## Safarka

Qoysaska ardayda ee u safraya dibedda Minnesota 15 maalmood oo dugsi oo isku xiga ama ka badan waa inay la xiriiraan xafiiska Dugsiga Sare ee Edina ka hor inta aysan safrin. Sida ay qabto hagista 2025-2026 ee ka socota Waaxda Waxbarashada ee Minnesota, iyo sida ay dhigayso siyaasadda degmada, ardayda waa in midkood laga saaraa diiwaanka inta ay ka maqan yihiin gobolka, ama qoysasku waa in ay bixiyaan kharashka waxbarashada ee muddadaas.

## Duubista Muuqaalka iyo Codka (Siyaasadda 717)

Dhismayaasha iyo dhulalka degmada dugsiga waxaa lagu qalabayn karaa kaamiradaha duuba fiidiyowga. La socodka fiidiyowga ah ayaa ka dhici kara dhisme kasta oo ka tirsan degmada dugsiga ama hanti kasta oo ay leedahay degmada dugsigu. La socodka fiidiyowga ah ee qolalka lookooyinka ama musqulaha waxaa kaliya la adeegsan doonaa xaalado aad u daran, iyadoo la raacayo xakamayn aan caadi ahayn, kaliyana uu si cad u ansixiyay kormeeraha guud.

## Dadka Soo Booqanaya Dhismayaasha Degmada (Siyaasadda 903)

Waalidiinta/masuuliyiinta iyo xubnaha bulshada waa lagu soo dhaweynayaa inay soo booqdaan dugsiyada. Si loo xaqiijiyo badbaadada kuwa ku jira dugsiga loogana fogaado carqalad ku timaada deegaanka waxbarashada, dhammaan dadka soo booqanaya dhismaha waa inay si toos ah u tagaan xafiiska guud ama qaybta qaabilaada marka ay soo galaan dhismaha, marka laga reebo munaasabadaha u furan dadweynaha. Dhammaan dadka soo booqanaya waxaa looga baahan doonaa inay iska diiwaangeliyaan xafiiska guud oo ay xirtaan “baajajka soo booqdayaasha” inta ay ku dhex jiraan dhismaha maalinta dugsiga. Dadka soo booqanaya waa inay haystaan oggolaanshaha maamulaha kahor inta aysan booqan fasal inta lagu jiro wakhtiga wax loo dhigayo. Shakhsi ama koox ayaa loo diidi karaa oggolaansho lagu booqdo dugsi ama hantida dugsiga, ama oggolaanshaha noocaas ah ayaa lala laaban karaa, haddii qofka soo booqanaya uusan u hoggaansamin habraacyada degmada dugsiga ama haddii booqashadu aysan dan ugu jirin ardayda, shaqaalaha, ama degmada dugsiga.

Ardayda looma oggola inay soo booqdayaal keenaan dugsiga iyagoo aan oggolaansho hore ka haysan maamulaha.

# Xeerarka Baarkinka Baabuurta iyo Socodka Gaadiidka (Siyaasadda 527)

Sababo badbaado dartood iyo booska baarkinka oo kooban awgeed, ardayda waxaa lagu boorinayaa inay raacaan basaska dugsiga. Ardayda gaari uma soo kaxaysan karaan dugsiga iyagoo aan haysan oggolaansho baarkin oo si cad uga muuqda muraayadda baabuurkooda. Codsiyada oggolaanshaha baarkinka waxaa la buuxiyaa kahor inta uusan bilaaban sanad dugsiyeed kasta.

Ma jiraan meelo baabuurta la dhigto oo loo qoondeeyay dadka haysta oggolaanshaha baarkinka. Gaari u kaxaysashada iyo gaari dhigashada dugsiga waa mudnaan, ma ahan xuquuq. Oggolaanshiyaasha waxaa loo bixiyaa si ku meelgaar ah iyadoo la iska filayo in shuruucda baarkinka iyo taraafigga la raaci doono. Ku guuldarraysiga in loo hoggaansamo xeerarka oggolaanshaha baarkinka waxay keeni kartaa luminta oggolaanshaha baarkinka iyo mudnaanta baarkinka-gaari kaxaynta.

Dugsiga Sare ee Edina iyo Dugsiyada Dadweynaha ee Edina masuul kama ahan xatooyada, kharbudaada, ama dhaawaca ka dhaca boosaska baarkinka. Darawallada waxaa lagula talinayaa inay xiraan baabuurta ay ku baakinaan boosaska baarkinka ee dugsiga.

## Xeerarka Oggolaanshaha Baarkinka

1. Oggolaanshaha baarkinka waa in la soo bandhigaa wakhti kasta marka baabuurka uu ku baakiman yahay dugsiga. Waa in la codsadaa laguna soo bandhigaa iyadoo laga laalaadinayo muraayadda gadaal laga eego.
2. Oggolaanshiyaasha laguma wareejin karo qofkale. Ardaydu ma bixin karto ama oggolaanshaha ma ka iibin karto arday kale ama gaari wadaag. Oggolaanshiyaasha baarkinka waxaa loo tixgeliyaa inay yihiin hantida dugsiga.

## Xadgudubyada

U-hoggaansanaanta xeerarka taraafikada waa lagama maarmaan waana wax la filayo. Si waafaqsan Siyaasadda 506, xadgudubyada waxay keeni doonaan suurtagalnimada luminta mudnaanta baarkinka iyo/ama ka joojinta xiisadaha.

1. Baabuurta si sharci-darro ah loo baakinto, lagu baakinto meel ka baxsan meelaha loogu talagalay, ama la baakinto iyadoo aan la soo muujin oggolaanshaha waa la xiri ama la jiidi gaarigooda digniin la'aan;
2. Xawaaraha, wadista taxadar la'aanta ah, ama wadista khatarta ah (sida uu maamulku u arko) waxay keeni kartaa in lagala noqdo oggolaanshaha baarkinka ee kooxda gaariga wada isticmaasha muddo dhan hal sano ama hal simistar iyadoo aan lacagta loo celin;
3. Oggolaanshiyaasha lumay ama la xaday waxaa la bixinayaa khidmadda beddelaada;
4. Xadidda, been abuurka ama isticmaalka oggolaansho been ah waxay keeni doontaa ka joojinta dugsiga iyo luminta mudnaanaha baarkinka.

# Buugga Siyaasadda Degmada (Tusmada Mowduucyada La Xushay)


| Mowduuca | Lambarka(Lambarada) Siyaasadda |
|---|---|
| Shilalka | 806 |
| Fursadaha Waxbarashada Beddelka Kale ah | 605 |
| Soo Xaadiritaanka | 503 |
| Xoog Sheegashada La Mamnuucay | 514 |
| Taleefanka Gacanta | 506, 524 |
| Hawlaha Fasalka | 619 |
| Cabashooyinka | 104 |
| Maareynta Xasaradda | 806 |
| Anshaxa | 506 |
| Dugsi iyo Goob Shaqo oo Ka Caagan Daroogada | 418 |
| Xogta Xiriirka Xaaladaha Degdegga ah | 515 |
| Liiska Shaqaalaha | 406 |
| Hubinada Sooyaalka Taariikhda Shaqada | 404 |
| Helitaanka Loo Siman Yahay ee Tas-hiilaadka Dugsiga | 801 |
| Sanad Dugsiyeedka La Dheereeyay | 508 |
| Safarrada Aqoon Kororsiga | 538 |
| Ururinta Lacagaha | 629, 709 |
| Hadiyadaha Shaqaalaha | 421 |
| Dhibaateynta iyo Rabshadda La Mamnuucay | 413 |
| Dullaysiga La Mamnuucay | 526 |
| Macluumaadka Caafimaadka | 516, 516.5, 518, 530 |
| Shaqada Guriga | 610 |
| Adeegsiga La Oggol Yahay ee Intarneedka | 524 |
| Wareysiyada Ardayda ee ay Sameynayaan Hay'ado Dibedda ah | 519 |

| | |
|---|---|
| Takoor La'aanta | 103, 401, 402, 521, 522, 528 |
| Ogeysiinta Ardayda Rabshadda Badan | 529 |
| Ballan-qaadka Daacadnimada | 531 |
| Jadwalka | 602 |
| Hawlaha Dugsiga | 627, 628 |
| Habraacyada Xiritaanka Dugsiga | 807 |
| Kalandarka Dugsiga | 602 |
| Baaritaanada | 502, 527 |
| Lebiska iyo Muuqaalka Ardayga | 504 |
| Siyaasadda Cuntada Dugsiga | 533 |
| Gudbidda iyo Ku Celinta Dugsiga | 513 |
| Daabacaadaha iyo Agabka Ardayga | 512 |
| Diiwaanada Ardayga | 515 |
| Ra'yi Ururinada Ardayga | 520 |
| Dugsiga Xagaaga | 623 |
| Dugsiyo Ka Caagan Tubaakada | 419 |
| Gaadiidka Ardayda Dugsiyada Dadweynaha | 713 |
| Kharribaadda | 506 |
| Fiidiyowga iyo La Socodka Elektaroonigga ah | 717 |
| Soo Booqdayaasha Dhismayaasha Degmada Dugsiga | 903 |
| Hubka La Mamnuucay | 501 |